# Talo-bixin siyaasadeed oo kooban

April 2025


A 14-year-old girl who spends her days doing household chores, Somali, Ethiopia © Nathalie Bertrams/GAGE 2024

# Gudniinka Fircooniga iyo Guurka carruurta ee Deegaanada Afar iyo Soomalida ee itoobiya

## Qaababka, khataraha, iyo meelaha mudnaanta leh in wax laga beddelo

**Qorayaasha**: Kefyalew Endale, Elizabeth Presler-Marshall, Workneh Yadete, Nicola Jones, Yitagesu Gebeyehu, Abdilahi Abdiselam, Kassahun Tilahun, Tassew Woldehanna and Kiya Gezahegne

## Hordhac

Dowladda Itoobiya waxay si rasmi ah uga go'an tahay in ay soo afjarto gudniinka fircooniga ee gabdhaha (FGM) iyo guurka caruurta. Dalka waxa uu leeyahay sharci adag oo labadaas dhaqan sharci darro ka dhigay labaatan sano ka hor, iyo sidoo kale siyaadsado iyo istiraatiijiyado badan oo loogu talagalay in lagu tirtiro dhaqanadan waxyeellada leh (28toomany iyo Orchid Project, 2023).Inkasta oo ay jiraan ballanqaadyadan iyo dadaallo joogto ah oo ay sameeyeen dowladdu iyo bahwadaagta horumarineed, hadana horumarka la gaaray wali waa mid aan sinnayn oo aad uga gaabis badan sidii la rabay si loo gaaro bartilmaameedyada. Inkastoo heerarka guud ee gudniinka firconiga ee gabdhaha (FGM) iyo guurka caruurta ay hoos u dhacayaan xaga heer qaran, haddana tirada guud ee gabdhaha halista ugu jira arrimahan way sii kordheysaa sababo la xiriira kororka tirada dadka (UNICEF, 2023).

Gabdhaha ku nool Deeganada xoolo-dhaqatada ah ee Afar iyo Soomaalida waxay si gaar ah ugu jiraan khatar sare. Sida lagu sheegay Sahankii Tirakoobka Dadweynaha iyo Caafimaadka Itoobiya (EDHS) ee ugu dambeeyay, heerka gudniinka gabdhaha da'doodu tahay 15–19 sano ee labadaas gobol wuxuu ka badan yahay 90%, waana mid aan isbeddelin, iyadoo intooda badan lagu fuliyay nooca ugu xanuunka badan ee gudniinka – infibulation (gooyo iyo tolid) (Hay'adda Tirakoobka Qaranka Itoobiya (CSA) iyo ICF, 2017). Sidoo kale, heerka guurka caruurta ayaa aad u sarreeya.

Dumarka da'doodu u dhaxayso 20–24 sano, 67% Deegaanka Afar iyo 49% Deegaanka Soomaalida dumarkan ayaa la guursaday iyagoo ka yar 18 sano.[1], [2]

---


1 Intii u dhaxaysay 2005 ilaa 2016, boqolkiiba gabdhaha da'doodu tahay 15–19 sano ee lagu sameeyay gudniinka Fircooniga ah ayaa hoos uga dhacay 65% ilaa 52% (Elezaj et al., 2019). Sidoo kale, muddadaas oo u dhaxaysa 2005 ilaa 2016, boqolkiiba gabdhaha la guursaday iyagoo ka yar 18 sano ayaa hoos uga dhacay 49% ilaa 40% (Erulkar, 2022).


2 Deegaanka Afar, 91% dhammaan haweenka da'doodu tahay 15–49 sano ayaa la guday. Iyadoo la ogyahay in tiro yar oo gabdho ah oo da'doodu tahay 15–19 lagu daray sahankan ama muunada daraasadkan, gabdhahaas dhexdooda, 91% ayaa la guday. Deegaanka Soomaalida, 99% dhammaan haweenka da'doodu tahay 15–49 sano ayaa la guday. Sidoo kale, in kastoo tiro yar oo gabdho ah oo da'doodu tahay 15–19 lagu daray sahankan ama muunada daraasadkan, 95% ayaa la

---

Tixraaca laga raacayo: Endale, K., Presler-Marshall, E., Yadete, W., Jones, N., Gebeyehu, Y., Abdiselam, A., Tilahun, K., Woldehanna, T. and Gezahegne, K. (2025) 'FGM and child marriage in Ethiopia's Afar and Somali regions: patterns, risks, and priority entry points for change.' Policy brief. London: Gender and Adolescence: Global Evidence (ibid.; Erulkar, 2022).

Figure 1: Research locations




Runtii, inkastoo horumar laga sameeyay xaga heer qaran, hadana waxaa muuqata in guurka caruurta uu sii kordhayo labada Deegaan ee Afar iyo Soomaalida (CSA iyo ICF, 2017; Elezaj et al., 2019; Erulkar, 2022).

Warbixintan siyaasadeed waxay ku saleysan tahay xog la ururiyey sanadkii 2024, oo laga helay laba degmo oo ka tirsan Deegaanada Afar iyo laba degmo oo ka tirsan Deegaanka Soomaalida. Waxayna qayb ka tahay daraasad muddo-sanado ah socotay oo maalgelinteedu ka timid hay'adda Irish Aid, kuna saleysan hab-raac cilmiyeed isku dhafan (tirakoob iyo wareysiyo), ujeedadeeduna tahay in la fahmo awood-siinta bulshada iyo dhaqaalaha ee gabdhaha iyo haweenka — gaar ahaan halista ay la kulmaan marka ay timaado gudniinka fircooniga ee gabdhaha iyo guurka caruurta.

Warbixintani waxay ku dhisan tahay cilmi-baaris saldhig ah oo la sameeyey sanadkii 2022 (fiiri Endale et al., 2022). waxayna soo koobaysaa natiijooyinka warbixin dheer oo la filayo (Endale et al., 2025). Warbixintu waxay ku bilaabanaysaa dulmar ku saabsan habka cilmi-baarista, ka dibna waxay u gudbaysaa natiijooyinka ugu waaweyn ee la xiriira gudniinka fircooniga iyo guurka caruurta. Ugu dambayn, waxaan soo bandhigaynaa waxyaabaha ka dhalan kara natiijooyinkaan si loo dedejiyo isbeddelada siyaasadeed iyo kuwa ficil ah, taasoo la jaanqaadaysa ballanqaadka dowladda Itoobiya ee yoolka Horumarka Waara (SDG) ee tirada 5 — kaasoo dhigaya in la ciribtiro gudniinka fircconiga iyo guurka caruurta marka la gaaro 2030.

## Habraaca Cilmi-baarista

Barnaamijka **Gender and Adolescence: Global Evidence (GAGE)** wuxuu fuliyey cilmi-baaris isku dhaf ah (tayo iyo tiro) bilowgii sannadka 2024, taasoo laga sameeyey Deegaanada Afar iyo Soomaalida (fiiri Jaantuska 1). Mid kasta oo ka mid ah Deeganadan, xogta waxaa laga ururiyey saddex degmo (woreda) oo ku yaal laba gobol-hoosaad (zone). Muunada tirakoobka dhexe ee GAGE wuxuu ka koobnaa 1,881 dhallinyaro ah iyo dad waaweyn oo da'doodu u dhaxaysay 12 ilaa 21 sano xilligii la wareysanayey, iyo sidoo kale 1,912 waalidiin ama daryeelayaal ah (fiiri Jadwalka 1). Su'aalaha sahanka waxaa lagu qaaday luqadda hooyo ee ka qaybgalayaasha (Af-Afar iyo Af-Soomaali siday u kala ahaayeen), waxaana ku jiray cutubyo la xiriira: gudniinka fircooniga ee gabdhaha (FGM), guurka caruurta, waxbarashada, llaha nolosha iyo shaqo helidda, caafimaadka galmada iyo taranka,dhaqdhaqaaqa, go'aan gaarista, iyo habdhaqanka jinsiga ku saleysan.Waxaa muhiim ah in la ogaado in gabdhaha dhalinyarada ah kaliya laga wareysatay waayo-aragnimadooda shakhsiyeed (oo ay ku jirto gudniinka fircooniga),halka daryeelayaasha ama waalidinta laga wareystay waayo aragnimadoodashakhsiyeed iyo mida dhamaan dumarka ku nool qoyska (oo ay ku jirto gudniinka fircoonigu).Muunada tayada leh (qualitative sample) sidoo kale si siman ayaa looga soo xulay gobollada. Waxayna ka koobnayd 65 gabdhood iyo haween dhallinyaro ah, 67 wiilal iyo rag dhallinyaro ah, 102 daryeelayaal (waalidiin), iyo 113 xog-ogaal muhiim ah oo ka kala yimid heerarka tuulo (kebele), degmo (woreda), iyo heer gobol (fiiri Jadwalka 2).

guday. Tirooyinka heer gobol ee gabdhaha da'doodu tahay 15–19 waa xisaab ay qorayaashu si gaar ah u sameeyeen, iyaga oo adeegsanaya xog aan miisaanayn oo laga helay Sahanka Tirakoobka Dadweynaha iyo Caafimaadka Itoobiya (EDHS).

### Jadwalka 1: Muunada Tirakoobka

| | | Afar | Somali | Total |
|---|---|---|---|---|
| Dhalinya-rada | **Wadarta** | **961** | **920** | **1881** |
| | Haween | 824 | 705 | 1529 |
| | Ragg | 137 | 215 | 352 |
| Waalidiinta | **Wadarta** | **976** | **936** | **1912** |
| | Haween | 897 | 833 | 1730 |
| | Ragg | 79 | 103 | 182 |

### Jadwalka 2: Muunada Tayo

| | Afar | Somali | Total |
|---|---|---|---|
| Gabdho iyo haween dhalinyaro ah | 33 (half married) | 32 (half married) | 65 |
| Wiilal iyo rag dhalinya-ro ah | 32 (half married) | 35 (half married) | 67 |
| Hooyooyin | 36 | 34 | 70 |
| Aabayaal | 16 | 16 | 32 |
| Xog-ogaalyo muhiim ah | 58 | 55 | 113 |
| **Wadarta** | **175** | **172** | **347** |

## Natiijooyinka

### Gudniinka Fircconiga ee gabdhaha

Xaaladda, Nooca, iyo Da'da la sameeyo Gudniinkan

Sahanku wuxuu muujiyay in 99% gabdhaha dhallinyarada ah iyo haweenka da'da yar ee lagu wareystay goobahan cilmi-baarista laga waday ee Deeganka Afar, iyo 80% kuwa Deeganka Soomaalida ay mar horey u soo mareen ama lagu sameeyay gudniinka Fircconiga ee gabdhaha (FGM) (fiiri Jaantuska 2). Kala duwanaanshaha heerarkani waxa uu inoo muujinayaa in ay kala duwanyihiin waqtiga la sameeyo gudniinkani: Deeganka Afar, gabdhaha waxaa la gudaa inta ay weli yihiin ilmo yar ama markay toddoba jir yihiin, taasoo ku xiran degmada ay ku nool yihiin (celcelis ahaan da'da gudniinkoodu waa 2 sano).Halka Deeganka Soomalida ,ay da'da gudniinku hoos u dhacayso iyadoo la socota da'da guurka (sababtoo ah gabdhaha aan gudnayn waa la ceebeeyaa iyada iyo qoyskoodaba) gabdhaha waxaa badanaa la gudaa intay ku jiraan da'da dhexe ee carruurnimada ilaa dhallinyaranimada hore (celcelis ahaan da'da gudniinku waa 9.3 sano). Tani waxay ka dhigan tahay in gabdhaha hada dhallinyarada ah ee aan weli la gudin ay weli haystaan waqti mustaqbalka lagu guddi doono.

Labada Deeganba, gudniinka gabdhaha wuxuu weli u egyahay inuu yahay dhaqan guud oo aan laga tegin. Xog-ogaal ka tirsan Waaxda Arrimaha Haweenka ee heer tuulo (kebele) oo Soomaali ah ayaa yiri:

> *"Waa wax aan la qiyaasi karin in gabar aysan gudnayn."*

Goobaha cilmi-baaristu ka socotay ee Deeganka Soomaalida, 100% gabdhaha iyo haweenka da'da yar ee sheegay in la guday ayaa xusay in lagu sameeyay nooca 3aad ee gudniinka (infibulation), iyagoo sheegay in la tolay ka dib markii la jaray xubinta taranka , iyadoo la adeegsanayo qodobyo ama qodxo. Gabar Soomaali ah oo 19 jir ah ayaa ka warantay waayo-aragnimadeeda ama waxay kala kulantay:

> *"Waxay jareen qayb jidhkayga ka mid ahayd, kaddibna waxay ku toleen Qodax... Bogsashadu waxay qaadatay wax ka badan hal bil."*

Goobaha cilmi-baarista ee Afar, iyadoo la ogyahay inta badan in ay gabdhuhu maraan gudniinka fircconiga ah,iyagoo ilmo yar ah, 80% gabdhaha iyo haweenka dhalinyarada ayaa waxay sheegeen in la gooyay oo ay nabar ku reebtay lakin aan la tolin. Gabdhaha iyo haweenka dhalinyarada ah ee Afar ee aan lagu sameyn tolniinka, ku dhowaad dhammaantood waxay sheegeen in lagu sameeyay nooca 2aad ee gudniinka oo ah goynta (excision). Aabe reer Afar ah ayaa sharxay dhaqanka hidaha ah:

> *"Marka hore waxay ka jarayaan qeybta ugu weyn ee kintirka gabadha, dabadeedna waxay ka gooyaan hilibka labada dhinac ee kintirka. Marka la gooyo dhammaan qeybahaas, lugaha ayaa la isugu xiraa xadhig si dhiiggu u xiro meesha la jaray oo si adag u xidhmo daloolka xubinta taranku."*

### Isbeddellada Da'da la xiriira ee Gudniinka fircconiga ee Gabdhaha

Wareysiga lala yeeshay daryeelayaasha (waalidiinta ama masuuliyiinta guriga) ayaa wax laga weydiiyay heerka gudniinka ee dhammaan haweenka ku nool qoysaska. Waxaa soo baxay saddex natiijo oo muhiim ah: kow ku dhowaad dhammaan gabdhaha Soomaaliyeed ee da'doodu tahay 15–17 sano (96%) ayaa la sheegay in la guday.Marka labaad in kastoo gudniinku ficoonigu yahay caado dhaqan ahaan lagu dhaqmi jiray laguna samayn jiray gabdhaha iyagoo caruur ah deeganka Afar, Gabdhaha da'doodu u dhaxayso 6-8 (86%) iyo 9-11 (91%) aad ayey ugu yar tahay in lagu sameeyo gudniinka Fircooniga ah marka la barbardhigo kuwa da'doodu u dhaxayso 12-17 (97%). In kasta oo tirooyinkani u baahan yihiin in si taxaddar leh loo fasirto, haddana waxay u muuqdaan inay tilmaamayaan in heerka gudniinku uu si tartiib ah hoos u dhacayo Deeganka Afar. Mida Saddexaad, inkastoo faafitaanka gudniinka nooca 3aad (infibulation) ee gabdhaha la guday uu guud ahaan yahay mid joogto ah da'aha kala duwan ee Afar iyo Soomaaliba uu saameeyo, haddana waxaa muuqata in heerka xubinta taranka gabdhaha ee la jarayo ka hor inta aan la xidhin ama la tolin uu si tartiib ah hoos usoo dhacayo sannadihii u dambeeyay. Goobaha daraasadda ee Afar, gabdhaha iyo haweenka da'doodu tahay 9 sano iyo wixii ka weyn ee la guday, wax yar in ka badan saddex-meelood meel ayaa laga soo waramay

in lagu sameeyay nooca tolmaha iyo xidhida (infibulation). Gabdhaha da'doodu tahay 8 sano iyo kuwa ka yar ee la guday, heerkooda gudniinku wuxuu ku dhowaaday isla intaas — wax yar ayuu ka hooseeyay saddex-meelood meel.

Si kastaba ha ahaate , 56% haweenka Afar ee ka weyn 18 sano iyo 48% gabdhaha Afar ee da'doodu tahay 12–17 sano ayaa laga saaray labbada dabnood iyo gudaha xubinta taranka ka hor inta aan la xidhin, halka gabdhaha Afar ee da'doodu tahay 8 sano iyo ka yar ay sidaas ku dhacday oo keliya 35%.

Isbeddello la mid ah ayaa ka muuqda goobaha daraasadku ka socday ee Soomaalida. Inkastoo 90% dhammaan haweenka qoyska ku nool ee la guday lagu soo sheegay in lagu sameeyay nooca tolmaha iyo xidhida (infibulation), iyadoon loo eegin da'da, haddana waxaa jiray hoos u dhac tartiib ah oo ku yimid boqolkiiba kuwa lagala jaray labbada dabnood iyo gudaha xubinta taranka ka hor xidhitaanka xubinta taranka oo dhan kuwaas oo kala ah : 51% dadka waaweyn ee da'doodu tahay 18 sano iyo ka badan, 44% gabdhaha da'doodu tahay 12–14 sano, iyo 37% gabdhaha da'doodu tahay 6–11 sano.

Cilmi-baaristan Tayada leh (qualitative research) waxay muujinaysaa in ay wali dagdag tahay oo ay wakhtigeeeda ka horeyso in hoos u dhaca heerarka gudniinka ee da'aha kala duwan ee goobaha daraasadda ee Afar loo fasirto sidii calaamad muujinaysa in dhaqankaasi sii yaraanayo.[3]

Inkastoo dhowr ka mid ah ka qaybgalayaashu sheegeen in ay kor u kacayso tirada gabdhaha da'da yar ee aan weli la gudin, arrintan waxaa si weyn loo la xiriiriyay in haweenka laga abaalmariyo si maaddi ah haddii ay ka fogaadaan gudniinka sidoo kale waxaa lala xiriiriyay isbeddel ku yimid waqtiga la fuliyo gudniinka.

Wiil 15-jir ah oo reer Afar ah ayaa sharxay:


> *"Walaashay oo 7 jir ah lama gudin. Sidoo kale waxay leedahay saaxiibo badan oo aan la gudin... Waan sameyn doonnaa mustaqbalka."*

Iyadoo la ogyahay in ka qaybgalayaasha labada Deegaan ay inta badan u arkaan in kaliya dhaqamada dhaqanka ah ee aad ka u daran ay yihiin gudniin dhab ah oo uu yahay gudniinka fircooniga ah (FGM), isla markaana ay aad ugu badan tahay in wax kasta oo ka duwan dhaqankaas loo arko sunna (oo la oggol yahay), haddana cilmi-baarista tayada ah waxay heshay caddeymo muujinaya in isbeddel uu jiro oo noocyo "khafiif ah" oo gudniinka ah la sameeyo, inkasta oo inta badan lagu arkay magaalooyinka ama meelaha u dhow magaalada. Goobaha daraasadda ee Deeganka Afar, ka qaybgalayaashu waxay sheegeen in gabdhaha yaryar laga jaray hilib ka yar intii hore ama/iyo in lugahooda la isku xiro muddo ka gaaban midii hore kadib marka la guddo, taasoo keentay in nabarradu yaraadaan. Aabe reer Afar ah ayaa yiri isagoo ka hadlayay gabdhihiisa:

> *"Gabadhayda kowaad waxaa loo guday sidii hore, laakiin gabdhahayga kale lama gudin... Gabadhayda kowaad aad bay u dhibaatootay gudniinkeedii darteed. Markii aan arkay xanuunkeeda, waxaan go'aansaday in gabdhahayga kale loo sameeyo gudniin cusub."*

Goobaha daraasadda ee Deeganka Soomaalida, ka qaybgalayaashu waxay sheegeen in gabdhaha da'da yar laga jaray hilib yar ama/iyo in la tolay hal ama laba jeer oo kaliya, halkii marka hore laga toli jiray lix ilaa toddoba jeer. Gabar Soomaali ah oo 22 jir ah ayaa sheegtay in kala duwanaanshuhu uu ku kooban yahay dhanka tolista:

> *"Sunna-du waxay kaga duwan tahay kaliya tolista malaha. lakin Qaybta xubinta taranka ee la jarayo waa isla mid."*




3 Tani waxay sabab u tahay in ay jiraan gabdho yaryar oo tiro ahaan ku nool qoysaska la tijaabiyay (taasoo sabab u ah xaddidaadda muunadda dhalinyarada ee diiradda la saaray).

### Wacyigellinta ku saabsan Sharciga mamnuucaya gudniinka fircooniga ee gabdhaha (FGM)

Wacyiga ama ogaanshaha in uu jiro sharci mamnuunacaya gudniinka fircooniga waxa uu si wayn ugu kala duwanyahay Deeganada itoobiya. Sahanku wuxuu muujiyay in dhallinyarada (52%) iyo daryeelayaasha (61%) ee goobaha daraasadda ee Afar ay aad uga wacyi badan yihiin dhallinyarada (18%) iyo daryeelayaasha (27%) ee goobaha daraasadda ee Soomaali in uu jiro sharci qaran oo mamnuucaya gudniinka fircooniga FGM (fiiri Jaantuska 3). Taas marka ka nimaadno , intii lagu guda jiray wareysiyada tayada leh ee daraasadkan , ma ahayn wax aan caadi ahayn in ka qaybgalayaal labada Deegaan ah ay sheegaan ciqaabaha lala kulmi karo (loona jeediyay gudayaasha dhaqameedka ah iyo waalidiinta sameeya nooca tolmaha iyo xidhada infibulation), sababtaasna ay keentay isbeddelka ku yimid dhaqankan gudniinka fircooniga ah (FGM). Gabar Soomaaliyeed oo 17 jir ah ayaa sheegtay in gudayaasha dhaqameedka ah aysan hadda tolaynin gabdhaha iyadoo sababtu tahay cabsi ay ka qabaan in xabsi la dhigo:

> *"Ma jiro gude doonaya inuu tolo gabar. Haddii lagu qabto isagoo sidaas samaynaya, waxaa loo qaadi doonaa magaalada degmada waxaana lagu xireyaa halkaas."*

Goobaha daraasadda ee Deegaanka Afar — halkaas oo la falgalka dhaqammo kale uu caadi yahay, shaqaalaha lix-biloodka ee fidinta caafimaadkuna ay si geesinimo leh uga hadlaan gudniinka fircooniga ee gabdhaha (FGM), islamarkaana ururo aan dawli ahayn oo diiradda saara arrimaha jinsiga ay muddo dheer ka shaqeynayeen — ka qaybgalayaashu waxay sidoo kale sheegeen in arrimahan ay door weyn ka qaateen isbeddelada dhacaya.

### Aaminsanaanta Diimeed iyo mida Dhaqan ee Saldhigga u ah Gudniinka Fircooniga ee Gabdhaha (FGM)


Dadka badankood ee ka qaybgalay daraasadkan jawaab bixiyaashu waxay si toos ah u sheegeen in, inkastoo farriimaha sharciyeed iyo caafimaad ee kahadlaya dhanka gudniinku ay muhiim u yihiin dhiirrigelinta isbeddelka, haddana waxa laf-dhabar u ah horumarka yar ee laga gaaray arrintan ay tahay wacdigii culimada diinta. Farriinta ugu weyn ee ka imaaneysa hoggaamiyeyaasha ama culimada diinta waa in, inkastoo tolmaha iyo xidhida infibulation-ka (nooca 3aad ee gudniinka) laga tago, jaridda kintirka (clitoris) ay diin ahaan la oggol yahay — xataa mararka qaar la sheegayo inay waajib tahay xaga diinta Islaamka. 5

Aabe reer Afar ah ayaa yidhi:

> *"Waan aqbalnay baritaankaas maadaama uu la jaanqaadayo waxa diinteena Islaamka ka tiri dhaqanka gudniinka."*

Aaminsanaanta la xiriirta xiriirka u dhexeeya gudniinka gabdhaha iyo diinta waa arrin adag oo si sahlan aan la kala saarayn, maadaama noocy ada fudud ee gudniinka mararka qaar aanba loogu aqoonin inay yihiin gudniin fircooni oo dhab ah (FGM), iyo maadaama Islaamku uu yahay tiir-dhexaad u ah dhaqanka dadka Afar iyo Soomaalida. Goobaha daraasadda ee Afar, halkaas oo dadka u muuqdaan inay si badan u aqoonsan yihiin in jaridda kintirka ay tahay nooc ka mid ah gudniinka fircooniga (FGM), sababo la xiriira la falgalka dhaqamada dariska ah ee Amxaarada dhallinyarada (66%) iyo daryeelayaasha (76%) ayaa soo sheegay in gudniinku yahay wax ay diintu amartay (fiiri Jaantuska 4). Hooyo 22 jir ah ayaa tiri:

**Jaantuuska 3: Aqoonta ku saabsan in Gudniinka Fircooniga ah (FGM) uu sharci darro yahay,** yadoo lagu kala eegayo da'da iyo deegaanka



*"Ma aanan rabin in gabadhaydu ay noqoto mid aan la gudin... Waa arrin aad u xun. Haddii ay dhimato iyada aan la gudin, jannada ma geli doonto."*[4, 5]

Taasi marka ka nimaadno, marka la weydiiyay sababta ugu weyn ee keenta gudniinka fircooniga ee gabdhaha, ka qaybgalayaasha Afar waxay u badnaayeen in ay tilmaamaan dhaqanka marka la barbardhigo diinta (tusaale ahaan: 39% dhalinyarada ayaa doortay dhaqanka, halka 28% ay doorteen diinta). Hooyo ayaa muujisay faan ku saabsan in gudniinka — gaar ahaan nooca 3 ee tolmaha iyo xidhida (infibulation) — uu yahay wax dhaqanka Afar ka soocaya bulshada kale, iyadoo tiri:

*"Annaga waa nala guday, waana sababta aan u gudno carruurtayada. Qof kale dhaqankan ma leeyahay annaga mooyaane."*

Goobaha daraasadda ee Deegaanka Soomaalida, halkaas oo ka qaybgalayaashu si gaar ah ugu arkaan nooca tolmaha iyo xidhida (infibulation) in uu dhaqan ahaan yahay kaliya gudniinka saxda ah, tiro yar oo ka mid ah daryeelayaasha (35%) iyo dhalinyarada (41%) ayaa sheegay in gudniinku yahay wax ay diintu farayso. Si kastaba ha ahaate, markii la waydiiyay sababta ugu weyn ee gudniinka fircooniga aha keena , labada kooxoodba waxay u badnaayeen in ay diinta doortaan marka la barbardhigo dhaqanka (tusaale ahaan: 45% daryeelayaasha ayaa doortay diinta, halka 34% ay doorteen dhaqanka). Macallin ka tirsan Deegaanka Soomaalida ayaa sharaxay:

*"Marka la eego diinta, waxaa la leeyahay qofka waa inuu bilaabaa salaadda marka uu gaaro 10 sano. Sida ay diintu sheegtay, gabdhaha waa in la gudaa marka ay da'daas gaaraan. Haddii kale, salaadda gabdhaha Allah wuu ka aqbali waayi karaa. Taasi waa aaminsanaanta bulshada."*


Wiil 20 jir ah ayaa caddeeyay in Islaamku uu kaliya farayo gudniinka, balse uusan waxba ka sheegin tolista gabadha — taas oo weli ay dad badan sameeeyaan, gaar ahaan meelaha miyiga ah, una arkaan inay tahay wax dhaqanku qabo. Wuxuu yiri:

*"Diintu waxay na faraysaa kaliya gudniinka, laakiin kama hadasho in gabadha la tolo... Waxaas waa dhaqan awgiis."*

### Qiimaynta Faa'iidooyinka iyo Khatarta Gudniinka Fircooniga ee Gabdhaha (FGM)

Sahanku wuxuu muujiyay in goobaha daraasadda ee labada Deegaan, ay caadi ahayd in dhallinyarada iyo daryeelayaashu aaminaan ama u arkaan in gudniinka gabdhuhu leeyahay faa'iidooyin bulsho. Heerarku waxay u dhexeeyeen ugu yaraan 35% dhallinyarada deegaanka Soomaalida ilaa ugu badnaan 52% daryeelayaasha deegaanka Afar (fiiri Jaantuska 5). Faa'iidooyinka la sheegayo ee gudniinka ayaa ku kala duwanaa Deeganada, waxaana deeganka Soomaalida lagu arkay in sidoo kale ay

**Jaantuuska 4:** Aaminsanaanta ku saabsan Gudniinka Fircooniga (FGM) iyo Diinta iyo Dhaqanka, iyadoo lagu kala eegayo da'da iyo deegaanka




4 Deeganada Afar iyo Soomaalida midkoodna ma ansixin sharciga qaran ee mamnuucaya gudniinka gabdhaha. Heer deegaan ahaan, gudniinka fircooniga ah weli waa sharci.

5 Waxaa jira afar aragti oo waaweyn oo ka tirsan madhabyada Islaamka oo ku saabsan gudniinka fircooniga ee gabdhaha (FGM). Faahfaahin dheeraad ah ka eeg: Islamic Relief Worldwide (2018), «One cut too many: Islamic Relief policy brief on female genital mutilation/cutting. Deegaanka Soomaalida, hoggaamiyeyaasha ama culimada diinta ee heer Deegaan waxay sannadkii 2023 soo saareen fatwo si adag uga soo horjeeda tolmaha iyo xidhida xubinta taranka (nooca 3aad ee gudniinka fircooniga).

ku kala duwan yahay jinsi ahaan. Goobaha daraasadda ee Afar, faa'iidada ugu weyn ee gudniinka loogu nisbeeyo — marka laga reebo gabdhaha iyo haweenka dhallinyarada ah, kuwaas oo badankood qirey in ay keliya maqleen in faa'iidooyin jiraan balse aysan si shakhsi ah u rumaysnayn — ayaa ahayd in lagu xakameeyo galmada gabdhaha (iyo haweenka). Aabe aya yidhi:

*"Haddii gabdhaha aan la gudin, waxay yeelan doonaan rabitaan galmo oo sareeya, mana u joogsan doonaan hal nin/qoys kaliya, waxayna geli doonaan sino ama waxay ku dhici doonaan galmo ka hor guurka.".*

Goobaha daraasadda ee deeganka Soomaalida, haweenka ka qaybgalay ayaa badankood u arkayay in gudniinka gabdhaha uu muhiim u yahay booska gabadha (iyo hooyada) ay bulshada dhexdeeda ku leedahay. Hooyo ayaa sharaxday:

*"Ceeb ayay nagu tahay gudniin la'aantu. Maadaama aan Soomaali ahay, waa in gabadhayda la gudaa. Haddii aanan gudin gabadhayda, dadka kale way i caayayaan, waxayna igu sheegayaan haweeney aan gabadheeda gudin. Intaa waxaa dheer, gabadha way dhibi doonaan waxayna ku naanaysi doonaan 'mid aan la gudin'."*

Dhanka kale, wiilasha iyo ragga waxay xooga saareen in gudniinka gabdhuhu uu yahay shardi guur, maadaama ay xaqiijinayso in gabadhu bikro tahay. Wiil 15 jir ah aya yidhi:

*"Gabadha ma guursanayso haddii aan la gudin."*

Labada Deeganba, gudniinka waxaa sidoo kale loo arkayay inuu gabdhaha ka ilaaliyo kufsiga maadaama (la xidhayo xubinta taranka).


Waxaa jiray kala duwanaansho aad u weyn oo Deegaan ahaan ku saabsan xaga aaminsanaanta khataraha gudniinka fircooniga, iyadoo ka qaybgalayaasha goobaha daraasadka ee Afar ay ku dhowaad laba jibbaar ahaayeen kuwa sheega khataraha la xiriira gudniinka fircooniga marka la barbardhigo deeganka Soomaalida (dhalinyarada, 73% Afar ah iyo 41% Soomaali ah) (fiiri Jaantuska 5). Ka qaybgalayaasha Afar waxay inta badan sheegeen in gudniinku keeno xanuun aad u daran oo gabadha ay la kulanto, isla markaana uu sababi karo xanuuno kaadi-mareenka iyo kuwa taranka oo raaga, galmadana uu ka dhigo mid aad u xanuun badan (haweeneyda iyo ninkaba labadoodaba), maadaama la filayo in ninku xilliga habeenka arooska uu furo xubinta taranka xaaskiisa, taasoo noqon karta inuu xoog u garaaco xubinta taranka — xataa mararka qaar uu ninku raadsado wiilal kale oo la caawiya haddii hawshu ay ku dheeraato toddobaadyada ugu horreeya ee guurka), iyo sidoo kale in ay adkayso oo ay khatar geliso dhalmada hooyada iyo ilmaha. Dhanka kale, ka qaybgalayaasha Soomaaliyeed waxay si joogto ah u inkireen in dhaqankan uu leeyahay wax khatar ah. Gabar Soomaali ah oo 21 jir ah, markii la weydiiyay haddii ay la kulantay wax dhibaato caafimaad ah gudniinka tolida ( infibulation) darteed, waxay ku jawaabtay:

*"Ma jiro wax dhibaato ah... Wanaag ayay noo ahayd."*

Dhalinyarada wiilasha Soomaaliyeed ayaa si gaar ah waxba uga warqabin khataraha gudniinka fircooniga ah. Wiil Soomaali ah oo 21 jir ah, oo muujiyay walaac uu ka qabo in ilmahiisa lagu dhalay qalliin (cesarean), ayaa sheegay in arintaasi wax xiriir ah la lahayn gudniinka fircooniga:

*"Ilmahayga waxaa lagu dhalay qalliin. Waqtigaas aad*

**Jaantuuska 5:** Aaminsanaanta ku saabsan faa'iidooyinka iyo halista FGM, iyadoo loo eegayo da'da iyo goboika



*baan u welwelay... Walaashay waxay dhashay toddoba carruur ah. Dhammaantoodna qalliinka ayay ku dhashay. Waa wax iska caadi ah in qalliinka lagu dhalo."*

Waxaa kale oo xiiso mudan leh in, ay jiraan kala duwanaansho deegaamaysan oo ku saabsan wacyiga khataraha gudniinka fircooniga (FGM), haddana ay tahay in keliya goobaha daraasadda ee Soomaalida lagu helay caddeyn muujinaysa in hada bilow ahaan gudniinku u wareegayo dhanka caafimaadka (medicalisation).

Inkasta oo sahanku muujiyay in inta badan gabdhaha Soomaaliyeed, sida kuwa Afar, ay weli lagu gudayo gacanta gudayaal dhaqameed, qaar ka mid ah ka qaybgalayaasha cilmi-baarista tayada ah ee Soomaalida ayaa sheegay in haatan gabdho badan lagu gudo xarumaha caafimaadka iyadoo loo sameeyo nooca 1aad ee gudniinka oo ah goynta kintirka (clitorectomy), si looga hortago in lagu sameeyo nooca 3aad ee tolmaha iyo xidhida (infibulation) oo ay gudayaasha dhaqameed fuliyaan. Qaar kale oo Soomaali ah ayaa sheegay in gudayaasha dhaqanka ay hadda bilaabeen inay gabdhaha siiyaan daawo xanuun-baabi'is ah (painkillers) iyo kiniino antibiyootiko marka la gudayo, iyo marka kale ee xilliga guurka markaas oo la furayo xubinta taranka iyadoo mindi lagu furo, saacado gudahood ka hor inta aysan bilaabin xiriirka guur-nimo.

### Taageerada ay dhalinyarada wiilasha ahi u muujiyaan gudniinka fircconiga (FGM)

Gudniinkafircooniga ee gabdhaha (FGM) wuxuu sidoo kale xiriir adag la leeyahay fahamka ragannimada dhaqanka. Labada goobood ee daraasadda , Afar (72%) iyo Soomaalida (85%) intooda badan wiilasha iyo dhalinyarada ragga ah waxay sheegeen inay doorbidayaan inay guursadaan haweeney la guday (fiiri Jaantuska 6). Gobolka Afar, halkaas oo dhalinyarada ragga ahi ay si weyn ugu janjeeraan ama doorbidaan guur la leh haweeney lagu sameeyay nooca 1aad ee gudniinka (clitorectomy), doorbidkooda ayaa la jaanqaadaya aaminsanaanta guud ee la xiriirta faa'iidooyinka gudniinka. Waxayna si buuxda ugu saleysan yihiin aragtida ku saabsan rabitaanka galmada ee sareeya ee gabdhaha (iyo haweenka). Nin dhallinyaro ah oo 22 jir ah ayaa sharaxay:

*"Hadda wiilasha/ragga deegaanka ayaa si fiican u fahmaya dhibaatooyinka ay leedahay gudniinkii hore, si ay u guursadaan gabdho kintirkooda laga jaray. Laakiin cidna ma guursanayso gabadh aan la gudin gabi ahaanba. Sababtu waxay tahay, jaridda kintirka gabdhaha waxay u faa'iideysaa in la yareeyo rabitaankooda galmo".*


Goobaha daraasadda ee Soomaaliyeed, halkaas oo 31% wiilasha dhallinyarada ah ay sheegeen inay doorbidayaan haweeney lagu sameeyay gudniinka nooca 3aad ee tolida iyo xidhida(infibulation), doorashooyinkooda waxay mar kale la jaanqaadayeen aaminsanaanta guud ee ku saabsan faa'iidooyinka gudniinka, waxayna ku saleysnaayeen walwalka laga qabo in gabdhuhu galmo yeeshaan ka hor guurka.
Nin Soomaali ah oo 19 jir ah ayaa yiri:

*"Haddii aan la tolin, waxaa loo arkaa mid la furay... Raggu waxay rabaan haweeney bikro ah."*

Nin kale oo Soomaali ah oo isla da'daa ah ayaa intaas ku daray, in inkastoo isaga iyo saaxiibadiis ay doorbidayaan haweeney la tolay oo laxidhay( infibulated), haddana taageeradooda dhaqankaasi kuma dhowa taageerada ay hooyooyinku u hayaan:

*"Raggu ma rabaan gabadh furan, laakiin hooyooyinku waa kuwa ugu taageerada badan."*

**Jaantuuska 7:** Taageerida sii wadida gudniinka fircooniga (FGM), da'ahaan iyo diin ahaan



### Dadka fikirkoodu siday u arkaan in la sii wado Gudniinka Fircooniga ee Gabdhaha (FGM)


Si aan layaablahayn ,iyadoo la tixgalinayo aamisanaanta diinta, dhaqanka iyo xaga galmada ee gabdhaha ,hadana taageerada lagu doonayo in gudniinka gabdhaha la sii wado waa mid sareysa — gaar ahaan goobaha daraasadka ee Soomaalida, halkaas oo wacyiga laga qabo khataraha dhaqankani uu u muuqdo mid hooseeya. Deegaanka Afar, 30% dhalinyarada sahanka laga qaaday iyo 38% daryeelayaashii la wareystay waxay sheegeen in ay rabaan in gudniinka fircooniga ah (FGM) uu sii socdo (fiiri Jaantuska 7). Tirooyin la mid ah oo laga helay Deegaanka Soomaalida waxay ahaayeen 54% iyo 55% siday u kala horreeyaan. Waxaa xusid mudan in, marka dhalinyarada la weydiiyay haddii ay qorsheynayaan in gabdhahooda mustaqbalka ay dhali doonanan ay ku sameeynayaan gudniinka fircooniga , jawaabahoodu ma ahayn mid waafaqsanayn rabitaankooda ku aaddan sii wadista dhaqankan gudniinka fircooniga ah. Goobaha daraasadka ee Afar, dhalinyarada ayaa u badnaa in ay sheegaan inay damacsan yihiin in ay gabdhahooda ay dhali doonanan mustaqbalka ku sameeynayaan gudniinka fircooniga (FGM) inagoo barbardhigayna taagersanaanta ay u muujiyeen in dhaqankan uu sii jiro (40% marka loo barbardhigo 30%) (fiiri Jaantuska 8). Goobaha daraasadda ee Soomaalida, xaaladdu waxay ahayd mid ka soo soo horjeedda midan hore ee Afar ta: dhalinyarada sheegaysa in ay doonayaan in mustaqablka gabadha ay dhali doonanaan ku gudayaan gudniinka fircooniga ayaa yarayd  marka la barbardhigo inta taageersan sii wadista dhaqanka (46% marka loo barbardhigo 54%). Sida ay ahayd doorbidkii wiilasha iyo dhalinyarada ragga ee ku aaddanaa xaasaskooda mustaqbalka, dhalinyarada la wareystay ee Deegaanka Afar waxay si aad ah (92%) u muujiyeen inay damacsan yihiin inay gabdhahooda mustaqbalka dhali doonaan u sameeyaan nooca 1aad ee gudniinka oo ah midka goynta kintirka (clitorectomy).

Deeganka Soomaalida, inta badan dhalinyaradu waxay muujiyeen inay qorsheynayaan inay doortaan nooca 2aad oo ah goynta kintirka iyo dabnaha xubinta taranka (excision – 39%) ama nooca 3aad ee gudniinka fircooniga ah ee tolida iyo xidhida xubinta taranka (infibulation – 20%).


### Aaminsanaanta waalidiinta iyo go'aan qaadashada ku saabsan gudniinka fircooniga ee gabdhaha(FGM)

Barnaamijyada lagu wajahayo ciribtirka nooca tolida iyo xidhida (infibulation)-ka iyo ugu dambeyn dhamaan gudniinka fircooniga ee gabdhaha(FGM) waa in ay si gaar ah uga fiirsadaan kala duwanaanshaha Deegamada ee ku aaddan aaminsanaanta hooyooyinka iyo aabbayaasha ay ka aaminsanyihiin gudniinka fircooniga ah. Labada Deegaan ee daraasadku — Afar iyo Soomaalida — hooyooyinka, oo xaaladdooda bulsho si weyn ugu xiran tahay in ay raacaan dhaqanka gudniinka fircooniga, isla markaana si fiican uga warqabay in gabdhahooda lagu faquuqayo ama la takoorayo haddii aan la gudin, ayaa 10 dhibcood oo boqolley ah ka sareeyey aabbayaasha marka la eego tirada sheegtay in gudniinku leeyahay faa'iidooyin isla markaana uu yahay wax diintu farayso (fiiri Jaantuska 9). Deeganka Afar, halkaas oo aabbayaal dhowr ah ay sheegeen inay ku adkaysteen in gabdhahooda yaryar lagu sameeyo gudniin aan aad u dhaawac badanayn kadib markii ay arkeen xanuunkii iyo dhibkii ay la kulmeen gabdhooda waaweyn ee hore loo

**Jaantuuska 8:** Rabitaanka la rabo in lagu sameeyo Gudniinka fircooniga (FGM) Gabdhaha mustaqbalka ay dhali doonan, deegaan ahaan



**Jaantuuska 9:** Daryeelbixiyaashu waxay ka aamin sanyihiin FGM, jinsi ahaan iyo deegan ahaan




jaray, hooyooyinku waxay 14 dhibcood oo boqolley ah ka yaraayeen aabbayaasha marka la eego tirada qirtay in gudniinku leeyahay khataro (71% hooyooyin ah iyo 85% aabbayaal ah).

Go'aaminta gudniinka gabdhaha ayaa sidoo kale ku kala duwanaa Deegaan ahaan. Goobaha daraasadda ee Afar, ka qaybgalayaashu waxay sheegeen in hooyooyinka — iyo ayeeyooyinka dhanka hooyada ah — ay mas'uul ka yihiin go'aaminta goorta iyo cidda gudaysa gabdhaha, hase yeeshee aabbayaashu waxay yeeshaan doorkooda ku aaddan nooca gudniinka la sameynayo.

Dhinaca kale, goobaha daraasadda ee Soomaalida, ka qaybgalayaashu waxay ku heshiiyeen in go'aamada la xiriira gudniinka gabdhaha ay hooyooyinka gaar u leeyihiin, halka aabbayaasha iyo ayeeyooyinku laga reebay go'aan qaadashada. Tani waxay muujinaysaa in barnaamijyada lagu wajahayo gudniinka ee Deegankaas ay tahay in xoogga la saaro hooyooyinka iyo hooyooyinka mustaqbalka, iyo sida ay hooyooyinku saamayn wayn ugu leeyihiin uguna sii xoojiyaan wiilashooda doorbidkooda ku aaddan gudniinkan fircooniga (FGM) ee haweeneyda ay mustaqbalka guursan doonaan la rabaan.

Hooyo Soomaaliyeed ayaa tiri:

> *"Dhaqanka Soomaaliyeed, dumarku waa kuwa go'aanka ka gaara gudniinka gabdhaha... Xataa haddii raggu ogolaan waayaan in gabdhaha la guddo, hooyooyinka ayaa ku khasbi doona in la gudo... Waxaan guday laba gabdhood oo aan leeyahay xilli uu ninkaygu safar ku maqnaa. Haddii uu joogi lahaa, marnaba ima ogolaan lahayn inaan fuliyo gudniinka... Aad ayuu iigu xanaaqay!"*


## Guurka Carruurta

### Da'da guurka iyo nooca guurka

Maadaama celceliska da'da gabdhaha la wareystay ay waqtigii xog-ururinta bartamaha daraasadda ay ahaayen dhallinyaro yaryar oo xilli dhexe ku jira (celcelis ahaan 16 sano Afar iyo 15.7 sano Soomaalida), waxaa xiligaa aad u yarayd tirada ka qaybgalayaasha ee hore u guursatay. Labada Deegaanba, kaliya 5% gabdhaha la wareystay ayaa sheegay inay mar hore guursadeen.Deegaanka Afar, gabdhihii hore u guursaday waxay celcelis ahaan guursadeen iyagoo 17.3 sano jir ah, ragga ay guursadeenna waxay ka weynayeen celcelis ahaan 4.6 sano. Ku dhawaad dhammaan gabdhaha Afar ee la guursaday (95%) waxay sheegeen in guurkooda ay waalidkood soo habeeyeen iyadoo la raacayo caadada "absuma", oo dhigaysa in lamaanaha la isguuriyo ay ahaadaan ehel isku hooyo ka soo jeeda (habro-wadaag); gabdhuhu wax doorasho ah kuma laha ninka la siinayo ama waqtiga guurka uu dhacayo. Hooyo 21 jir ah oo reer Afar ah ayaa xusuusatay:

> *"Maalinta xafladdii guurka ayaan ba maqalay inaan isaga [ninkayga] la ii guurinayo. Way i qabteen waxayna ii sheegeen isla maalintaas... Aabbahay ayaa go'aansaday inaan guursado."*

Deegaanka Soomaalida, halkaas oo dhaqamada guurku ay aad uga duwan yihiin, gabdhihii hore u guursaday waxay guursadeen iyagoo da'doodu ka yartahay gabdhaha Afar (celcelis ahaan 16 sano), farqiga da'da ee lamaanaha ayaa sidoo kale yaraa (celcelis ahaan 2.2 sano), waxaana ku dhowaad dhammaan guurarka (94%) ay go'aansadeen




labada dhallinyaro ee isguursanaya iyaga laftooda. Gabar Soomaaliyeed oo 18 jir ah, kuna guursatay da'da 15 sano, ayaa sheegtay doorashadeeda guur:

> *"Qoyskaygu waxba kama ogayn. Aniga ayaa kaligay go'aansaday."*

### Isbeddellada ku saabsan dhaqanka guurka carruurta

In kasta oo waqtigii xog-ururinta bartamaha daraasadda ay ahayd wax dhif ah in gabdhaha iyo haweenka dhallinyarada ahi ay hore u guursadeen, haddana sahanku wuxuu muujiyey in goobaha daraasadda ee labada deegaan guurka carruurtu uusan kaliya caadi ahayn, balse uu yahay wax la filan karo oo la aqbalo. Deeganka Afar (84%) iyo Soomaalida (83%), in ka badan afar-meelood meel (4/5) daryeelayaasha ama waalidiintu ayaa sheegay in intooda badan gabdhaha deegaanka ay guursadaan iyaga oo aan weli gaarin 18 sano jir (fiiri Jaantuska 10). Deegaanka Soomaalida, tiro aad u badan oo dhalinyaro ah (75%) ayaa iyana ku raacsanaa fikirkaas.

Dhalinyarada Afar ayaa iyagu u muuqday in ay ka yar yihiin kuwa rumeysan in guurka carruurtu yahay wax caadi ah, iyagoo 'kaliya' 60% ay rumeysan yihiin in inta badan gabdhuhu guursadaan ka hor da'da 18 sano. Aaminsanaanta la xiriirta baahsanaanta guurka carruurta ayaa si gaar ah u xiiso leh marka la barbar dhigo waayo-aragnimada hooyooyinka laftooda: goobaha daraasadda ee Afar, 88% hooyooyinka ayaa guursaday iyaga oo aan weli gaarin 18 sano; halka goobaha Soomaalida, tiradaas ay ahayd kaliya 58%. Sahanku wuxuu sidoo kale muujiyey in aaminsanaanta ku saabsan baahsanaanta guurka carruurtu aysan si weyn ugu xirnayn aqoonta la xiriirta in guurka carruurtu yahay sharci darro sida ku xusan sharciga qaran, gaar ahaan Soomaalida, halkaas oo kaliya 13% dhalinyarada ah ay sheegeen in ay ka war hayaan jiritaanka sharciga (fiiri Jaantuska 11).

Cilmi-baarista tayada leh waxay si qoto dheer u iftiimisay natiijooyinka sahanka. Goobaha daraasadda ee Soomaalida, halkaas oo ku dhawaadh kalabadh gabdhaha dhallinyarada ah (47%) ay ahaayen kuwo weligood iskuul dhigan (sababtoo ah dhammaan bulshooyinka miyiga ah iskuul ma leh). gabdhahuna waxay u qaabilsan yihiin biyo keenista, waalidiintuna inta badan waxay aaminsan yihiin, sida ay hooyo ka mid ah noo sheegtay in:

> *"Iskuulka loo diro gabadha ay ka dhigayso dhillo"*

Ka qaybgalayaashu waxay sheegeen in guurka carruurtu uusan oo kaliya kor u kicin sanadihii u dambeeyay, balse sidoo kale da'da lagu guursanayo ay si aad ah hoos ugu dhacday maadaama dhalinyaradu ay la wareegeen go'aanka guurka. Hoggaamiye qabiil Soomaaliyeed ayaa yiri:


> *"Gabdhaha intooda badan waxaa la guursadaa ka hor intaanay 18 sano gaarin... Waxaan qiyaasayaa in 70% guurarkaas ay ku lug leeyihiin dad ka yar 18 sano."*

Guddoomiye Qabalee(kebele) oo ka tirsan gobolkaas ayaa intaas ku daray:

> *"Waxaan arkay gabdho da'doodu tahay 10, 12 iyo 13 sano oo la guursanayo."*

Dhinaca kale, goobaha daraasadda ee Afar, inkasta oo gabdho badan ay guursadaan kahor da'da qaangaarnimada (gaar ahaan meelaha miyiga ah, halkaas oo waalidiintu diiradda saaraan 'koritaanka jirka gabadha, haddii ay bilowday caadada', sida uu sheegay aabbe), da'da guurka

**Jaantuuska 10:** Garashada in guurka caruurta uu sharci darro yahay, da'ahaan iyo deegaan ahaan




ee goobaha daraasadda guud ahaan si tartiib tartiib ah ayay kor usoo kacaysaa iyadoo la jaanqaadaysa kordhinta isdiiwaangelinta gabdhaha iskuulka (67%) iyo wacyiga waalidiinta ee khataraha la xiriira guurka carruurta.

Wiil 18 jir ah oo reer Afar ah ayaa yiri:

> *"Waqtiyadii hore, gabdhaha deegaanka waxay guursan jireen iyaga oo da'doodu tahay 13, 14 ama 15... Laakiin hadda, dadaalka ay sameeyeen haayadaha aan dawliga ahayn( NGO) yada, culimada iyo ragga shareecada yaqaanna awgiis, da'da guurka ee gabdhaha waa la kordhiyey waxyar, waxaana hadda gabdhaha halkan ku guursadaan iyaga oo 17 sano ka weyn."*

Ka qaybgalayaal reer Afar ah waxay sheegeen in helitaanka waxbarashada ee gabdhuhu ay si gaar ah muhiim ugu ahayd horumarka dhowaan laga sameeyay dhimista guurka carruurta. Iskuulladu waxay barayaan gabdhaha in guurka carruurtu yahay sharci-darro, in ay xaq u leeyihiin inay diidaan, iyo in uur qaadista xilliga hore ay halis leedahay. Iskuulladu sidoo kale waxay siiyaan dhalinyarada meel ay kaga warbixiyaan guur qorshaysan si waqtigeeda loogu joojiyo iyadoo mas'uuliyiintu soo faragelinayaan, waxayna gabdhaha ka dhigayaan ardayad, halkii looga arki lahaa gabadh aroosad suge ah. Gabar 18 jir ah oo aan wali la guursan kana tirsan deegaanka Afar ayaa sidaan sheegtay:

> *Waxay i waydiinayeen guur tan iyo markii aan fasalka 9aad dhiganayay. Saddex sano ayay iga codsanayeen in la i guuriyo, laakiin aabbahay ma ogolayn in uu nin I siiyo. Wuxuu yiri maadaama aan ardayad ahay, wuxuu doonayaa inaan guursado kaddib marka aan waxbarashadayda dhammaysto".*

Ka qaybgaleyaal dhowr ah oo reer Afar ah ayaa sidoo kale ammaanay dadaalka ay culimada diintu ugu jiraan ka hortagga guurka carruurta, gaar ahaan marka ay gabdhuhu ka hor yimaadaan guurka lagu qasbayo. Xaqiiqdii, mid ka mid ah ka qaybgalayaasha oo deggan magaalo ayaa sheegay in hoggaamiye diimeed uu si wadajir ah ula shaqeeyay mas'uuliyiinta degmada(woreda) si waalidiinta gabadha — iyo madaxii qabalega (kebele) — loogu xiro kaalintii ay ku lahaayeen qasabka guurka ilmaha.

### Doorbidka dhalinyarada ee da'da guurka

Inkasta oo ay aaminsanyihiin yihiin in inta badan gabdhuhu ay guursadaan iyaga oo aan qaangaadhin, haddana aqlabiyadda dhallinyarada la wareystay ee ku sugan labada Deegaan – Afar (88%) iyo Soomaalida (84%) – waxay sheegeen in ay si shaqsi ahaan ah u doorbidayaan **in ay guursadaan marka ay qaangaar noqdaan.** Deegaanka Afar, doorashadan waxay inta badan salka ku haysaa sida guurarka loo maareeyo ama ay u dhacaan. Gabdhaha la guursado iyagoo da'doodu yar tahay ma helaan wax doorasho ah; waxay guursadaan qofka iyo waqtiga ay waalidiintoodu (gaar ahaan aabbahood) doortaan, waxaana mararka qaar lagu khasbaa inay joojiyaan waxbarashada si ay guurkaas uga qeybqaataan. Dhinaca kale, **Gabdhaha guursada marka ay gaaraan da'da qaangaarka,** waxay ka fogaadaan halista uur qaadista iyada oo aan jidhkoodu weli u diyaarsanayn, waxayna sidoo kale helaan fursad ay ku doortaan ilma adeerka ay guursanayaan. Aabe arrintan ka hadlay ayaa yidhi:

> *"Hadda, gabdhaha iyo haweenku way og yihiin xuquuqdooda, sidaas darteed haddii nin waayeel ah oo ah ina-adeerkeed uu rabo inuu guursado, way ka*

*diidi doontaa... Gabdhuhu hadda waxay rabaan inay guursadaan wiilal dhallinyaro ah oo ay da' ahaan is le'eg yihiin."*

Deegaanka Soomalida, dhalinyarada la wareystay ee sheegay inay doorbidayaan inay guursadaan markay waaweynaadaan waxay si weyn uga duwan yihiin aragtida guud ee sheegaysa in xitaa marka waalidiintu isku dayaan inay dib u dhigaan guurka, dhalinyaradu aanay dhageysan waalidkooda, maadaama ay u arkaan in guurku yahay waddada ugu fudud ee lagu gaadho heerka dadka waaweyn ee ay la nool yihiin. Gabar 20jir ah oo guursatay iyadoo 15 jir ah ayaa xustay in ay iska indhatirtay tallooyinka waalidiinteeda:

*"Waalidkey waxay igu yiraahdeen: 'Waa in aadan ku deg-degin guurka; waxaad guursan kartaa marka aad si fiican u korto...' Aniguse waxaan ku idhi: 'Guurku waa qadarka Ilaahay. Ilaahay baa guurka go'aamiya...'"*

Wiil 20-jir ah oo isna guursaday isagoo 11 jir ah gabar hal sano ka yar, ayaa sheegay in go'aankiisa uu ku salaysnaa daawashada asxaabtiisa:

*"Waan ognahay in guurku yahay wax wanaagsan. Qof kastaa wuu ogyahay taas. Waxaan aragnaa dad guursanaya, aroosyadana waan ka qeybgali jirnay."*

Si ka duwan deegaanka Afar ta, maanu helin wax caddeyn ah oo ku saabsan in culimada diinta ee Soomaalidu ay faro geliyaan si ay uga hortagaan guurka carruurta, sida lagu ogaaday cilmi-baarista tayoda leh (qualitative research). Runtii, qaar ka mid ah culimadu waxay si cad u sheegeen inaysan marnaba isku dayi doonin inay ka leexiyaan lammaanaha da'da yar guurka degdegga ah, maadaama ay rumeysan yihiin in guurka carruurta uu ka fiican yahay galmada guurka ka horreysa.

## Gunaanad

Iyadoo la raacayo cilmi-baadhisyo hore, cilmibaadhista GAGE waxay muujinaysaa in gudniinka fircooniga ahi uu wali yahay mid si baahsan loogula dhaqmo gabdhaha deegaannada Afar iyo Somalida. Si kastaba ha ahaatee, maadaama waqtiga gabdhaha la gudayo iyo da'da lagu gudayo uu kala duwan yahay, gabdhaha dhallinyarada ah ee lagu daraasadeeyay deegaanka Somalida mayna ahayn dhamaan kuwa gudniinka lagu sameeyay.

Nooca gudniinka ay gabdhuhu maraan ayaa ah arrin muran dhalisay labadaba deegaan Afar iyo Somali, maadaama dadkii la wareystay ay inta badan Waxa la xidhiidhinayaan dhaqammada soo jireenka ah ee aadka Faragelinta ba'an ugu hayay marka ay ka hadlayaan gudniinka hadda socda. Dad badan (gaar ahaan kuwa degan magaalooyinka) aad ayay uga taxaddaraan in ay dhaqanka hadda socda u arkaan "sunna" oo diintu ogoshahay. Inkastoo intooda badan gabdhaha labada Deegaan lagu sameeyo nooca cidhiidhinta xubinta taranka, haddana cadadka hilibka laga jarayo ka hor inta aan cidhiidhinta la samayn, iyo heerka cidhiidhintanta lafteeda, waxay u muuqdaan kuwo si tartiib tartiib ah u "fiicnaanaya" oo hoos usoo dhacaya  waqtiba wakhtiga ka danbeeya, taasoo ay sabab u yihiin dadaallo iskaashi oo ay sameeyeen dowladda, NGOyada, iyo culimada diinta oo u ololaynaya in laga guuro nooca tolida iyo xidhida (infibulation) loona guuro jaridda kintirka oo keli ah(clitorectomy).

Inkastoo ay jiraan kala duwanaanshiyo gobolaysan – iyadoo dadka deegaanka Afar ay guud ahaan ka wacyigarsan badan yihiin oo ay ka warhayaan halista gudniinka, aadna ugu nugul yihiin in la beddelo ama laga tago, marka la barbardhigo Soomaalida – haddana taageerada dhaqanka gudniinka ayaa weli aad u sarreysa labadaba deeganba. Taageeradaas waxaa sal u ah aaminsanaanta in gudniinku yahay waajib diineed, qeybna ka yahay hiddaha iyo dhaqanka, iyo in lagu xakameeyo galmada gabdhaha si ay ugu qalmaan guur. Runtii, deegaanada Soomaalida waxaa ka muuqday taageero toos ah oo ay haween waaweyn iyo wiilasha guurdoonka ah siiyeen nooca tolida iyo cidhiidhinta xubinta taranka (infibulation), iyagoo u arkaya kaliya in habkaas lagu xaqiijin karo bikranimada gabadha. Sidoo kale, Sidoo kale, deegaanka Soomalida, waxaanu helnay caddayn muujinaysa caafimaadeynta (medicalisation) gudniinka iyo furista xubinta tarankaba, iyadoo dadka waaweyn iyo dhallinyaradu ay si wadajir ah u qirayaan in gudniinku yahay arrin dumarka gaar u ah. Deegaanka Afar, waxaanu ogaanay in aabbayaashu door ku leeyihiin nooca gudniinka la marinayo gabdhahooda, islamarkaana ay muujiyeen diyaar u ahaansho ah in dhaqankan gebi ahaanba laga tago.

Maaddaama celceliska da'da dhallinyarada la wareystay aysan weli gaarin 16 sano xilliga xog-ururinta dhexe, tiro yar oo ka mid ah gabdhaha ayaa guursaday. Waxaa la filayaa in arrintani is beddesho marka xogta dhammaadka (endline) la helo, maaddaama dad badan ay isku raaceen in khatarta guurka carruurta si weyn u kororto marka gabadhu bilowdo caadada ama gaarto da'da 15 sano. Waxa  muhiim u ah, in la ogaado gabdhaha labada deegaan ee daraasadda lagu sameeyey ay halis ugu jiraan guurka carruurta, sababaha halistaas ka dambeeya way kala duwan yihiin. Labada deegaanba, dadka waa weyn iyo dhallinyaraduba waxay lahaayeen wacyi xaddidan oo ku saabsan sharciga guurka. Deegaanka Afar, waxaa la sheegay in guurka carruurta uu weli ku badan yahay, maaddaama waalidiintu ay weli ku dheggan yihiin dhaqanka absuma ee guurka ehelka ah. Si kastaba, waxaa sii kordhaya fursadda gabdhaha (iyo macallimiintooda) u helaan waxbarasho rasmi ah si ay u difaacaan dib-u-dhigista guurka iyo inay doortaan lammaane ay iyagu doorteen ama ku qanacsanyihiin. Deegaanka

Soomaalida, iyadoo culimada diinta ay sheegayaan in ay xaq u leeyihiin inay ansixiyaan guurka xataa haddii gabadhu sharci ahaan wali yar tahay, dadka la wareystay waxay qireen in guurka carruurta uu kordhay xaga gabdhaha iyo wiilashaba, da'da guurkuna hoos u dhacday, taasoo la xiriirta kororka guurarka ay wataan dhallinyaradu iyaga oo aanay waalidiintoodu go'aanka ku lahayn.

### Saameynta Siyaasadda iyo Barnaamijyada

Natiijooyinka cilmi-baadhistayadu waxay muujinayaan dhowr talaabo oo mudnaanta koowaad leh oo ay tahay in dowladda Itoobiya iyo la-hawlgalayaasheeda horumarineed ay qaadaan si loo gaadho yoolalka Khariidadda Qaran ee La Maalgaliyey ee Joojinta Guurka Carruurta iyo Gudniinka fircooniga ee Gabdhaha (FGM/C) iyo yoolka SDG 5.3 ee ka hortagga dhaqamada waxyeellada leh. Halkan, waxaan iftiiminaynaa doorka muhiimka ah ee ay leeyihiin qaybaha kala duwan ee bulshada si isbeddel degdeg ah loogu sameeyo nolosha gabdhaha iyo haweenka dhallinyarada ah, iyo tallaabooyinka si gaar ah loogu baahan yahay inay qaadaan, iyadoo la og yahay in dadaalladu ay u baahanyihiin iswaafajin heer sare ah oo ay ka wada qaybqaataan dhammaan waaxyaha kala duwan.

## Waaxda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada

Maadaama dowladaha degaanka ee Afar iyo Soomaalida aysan weli si ku filan u maalgelin ladagaallanka Gudniinka fircooniga (FGM) iyo guurka carruurta, isla markaana waaxda cadaaladda aysan si mudnaan leh u wajihin Dhaqamada ee Waxyeellada leh, Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada waa in ay hogaamiso una xilsaarto gole cusub oo iskudhafan oo ka kooban khubaro jinsiyadeed oo ka kala socda wasaaradaha cadaaladda, waxbarashada, caafimaadka, beeraha, iyo maaraynta masiibooyinka si ay u sameeyaan qorsheyaal gaar ah oo ku habboon deegaanada una horseedi kara joojinta dhaqamadaasi.

Maadaama caadooyinka ku saleysan sinnaanta la'aanta jinsiga ay xaddidaan gabdhaha iyo haweenka fursadooda waxbarasho, shaqo helid, iyo awood u lahaanshaha go'aan ka gaarista noloshooda – taasoo ugu dambayn horseedda gudniinka fircooniga iyo guurka carruurta – dhammaan heerarka waaxda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada waa in ay mudnaan siiyaan dadaallo si toos ah u wajaha caadooyinkan iyo aaminsanaantoodan. Tani waa in ay ka mid noqdaan:

- Abuuridda iyo xoojinta (iyadoo la eegayo duruufaha deegaanka) xarumo sir ah oo ay gabdhaha iyo haweenka si kalsooni leh ugu soo gudbin karaan ku xad-gudubyada xuquuqdooda;
- Mudnaanta la siiyo wacyigelinta gabdhaha iyo haweenka ee ku saabsan xuquuqdooda iyo xuquuqda ay mustaqbalka u leeyihiin carruurtooda, iyo sida ay si qarsoodi ah ugu gudbin karaan ku xadgudubyadaas (tusaale ahaan: barayaal, xafiisyada haweenka, booliiska, iyo hay'adaha cadaaladda);
- Abuuridda fursado ay gabdhaha iyo haweenku ku horumarin karaan xirfadahooda – gaar ahaan kuwa laga reebay waxbarashada rasmiga ah – sida
    - barashada akhriska iyo xisaabta;
- La shaqeynta hooyooyinka – iyada oo loo marayo in la tababaro waalidiinta lana siiyo xiisado ku saabsan korinta ilmaha – si loo xoojiyo awooda gabdhahooda, loogana dhaadhiciyo wiilashooda in ay qaataan ragannimo cusub oo ayna u arkin in gabadh aan la gudin ay tahay gabadh "aan la guursan karin".
- Wacyigelinta bulshada si ay u fahmaan muhiimadda waxbarashada gabdhaha, iyo sidii ay si dhab ah u taageeri lahaayeen waxbarashadooda, sida maaraynta waqtigooda iyo isku-duwidda gaadiid oo lala kaashanayo qoysas kale si ay socod ammaan leh ugu tagaan iskuulka (tusaale: koox-koox isku raacaan ama dad waaweyn weheliyaan).
- Ka shaqaynta sumcadda haweenka ee bulshada oo laga gooyo fikirka ku xeeran daahirsanaanta gabadha iyo guurka 'guuleysta'
- Ka hortagga gudniinka fircooniga (FGM) iyo guurka carruurta si ku saleysan baahida deegaanada, iyadoo la tixgelinayo go'aan qaadashada (tusaale ahaan: gabdhaha Soomaaliyeed waxay leeyihiin saamayn weyn maadaama gudniinka fircooniga (FGM) lagu sameeyo waqti dambe iyo guurarka deegaankaas badanaa ka dhaca oo ay go'aamiyaan dhallinyaradu, halka ayeeyooyinka ay saameyn badan ku leeyihiin go'aanka gudniinka fircooniga FGM ee deeganka Afar) iyadoo la barayo gabdhaha, waalidkooda, iyo bulshada khataraha labadan dhaqan ee waxyeellada leh, iyo in laga hortago faa'iidooyinka la rumeysan yahay, in ay leeyihiin dhaqamadani,lana siiyo wacyigelin ku saabsan faa'iidooyinka dhabta ah ee laga helo ka fogaanshaha caadooyinkan; • Abuurista koox tusaale wanaagsan ah – sida gabdho waxbartay iyo haween karti leh, iyo wiilal/rag feker furfuran leh — kuwaasoo door muuqda ka ciyaara bulshada iyo baraha bulshada;
- Ballaadhinta xarumaha adeegyada "hal-meel" ah (one-stop centres) ee taageerada u fidiya dadka la kulma tacaddiyada, iyo kor u qaadista wacyiga bulshada ee ku saabsan jiritaankooda si ay si wanaagsan u taageeraan dadka ka badbaaday tacaddiyada ku saleysan jinsiga iyo galmada, iyadoo mudnaanta la siinayo deegaannada ay saamaysay colaadu. Sidoo kale, lala shaqeynayo bixiyeyaasha adeegyada xarumahaas si ay u ballaariyaan shaqadooda una taageeraan dadka halista ugu jira gudniinka fircooniga ah ama guurka carruurta.

- La shaqeynta laamaha kale ee dowladda si loo mideeyo sharciyada heer qaran iyo deegaan, iyo xoojinta iyo fidinta fatwadii 2023 ee dhanka ka ahayd gudniinka fircooniga ah, iyadoo lagu darayo erayo qeexaya inaysan jirin qayb ka mid ah jirka haweeneyda oo ah "xaaraan" (haram).

Maadaama aabbayaasha, walaalaha, saaxiibbada wiilasha ah, wiilasha wax shukaansanaya iyo ragga xaaska leh ba ay door ku leeyihiin sii wadista caadooyinka jinsiga ee si ba'an u waxyeelleeya gabdhaha iyo haweenka – oo ay ku jirto gudniinka fircooniga ah (oo si khaldan loogu sifeeyo in uu khuseeyo haweenka oo keliya) – waa in Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada ay si dhow ula shaqeyso Wasaaradda Waxbarashada iyo hay'adaha samafalka ee diiradda saara carruurta iyo arrimaha jinsiga, si ay ugu qabtaan dood-wadaagyo ku saleysan dugsiyada iyo bulshada, iyo ololayaal warbaahineed oo wax ka beddeli kara fikradaha iyo dhaqamada ragga. Arrintan waa in ay ka mid noqdaan:

- Kor u qaadista wacyiga aabbayaasha iyo walaalaha si ay si fiican u taageeraan xaasaskooda iyo walaalahooda si gabdhuhu waqti ugu helaan waxbarashada;
- Waxbaridda wiilasha iyo raggaba sababta aysan muhiim u ahayn in gabadha la guursanayaa ay ahaato mid la guday, iyo sida ay iyagu uga ilaalin karaan walaalahooda iyo gabdhahooda gudniinkan fircooniga ah, ayna uga hortagi karaan dhaawacyada ka dhasha gudniinkan oo saameeya xaasaskooda.
- In laga shaqeeyo si loo kala saaro sumcadda ragga ee bulshada dhexdeeda iyo fikirka ku xiran bikranimada gabdhahooda iyo "guurka guuleysta";
- In wiilasha iyo ragga la baro faa'iidooyinka dhabta ah ee ay leedahay xaaska qaangaarka ah (tusaale ahaan: lammaane gacan ka gaysan kara shaqada guriga, halis yar inta lagu jiro dhalmada), iyo khasaaraha ay leedahay guursashada ilmo yar (sida: furriinka dagdaga oo aad u sareeya , dhibaatooyinka korinta ilmaha, halista iswaafaq la'aanta galmada);
- In la dhiirrigeliyo go'aan wadaagyo caddaalad ku dhisan oo ku saabsan nolosha qoyska iyo qaybinta shaqooyinka guriga, iyadoo la diidayo rabshadaha xaga raga ka imaanaysa.

Maadaama gudniinka fircooniga ah looga arko waajib diineed Deeganada Afar iyo Soomaalida, halka guurka carruurtana looga arko mid diin ahaan la aqbali karo – xitaa laga doorbido guurka da'da qaangaarka – waxaa aad muhiim u ah in wasaaradaha Haweenka iyo Arrimaha Bulshada iyo Cadaaladda ay si dhow ula shaqeeyaan hay'adaha aan dowliga ahayn si ay ula falgalaan culimada diinta, si loo hormariyo yareynta waxyeellada muddo dhow gudaheed iyo, ugu dambeyntiina, in gabi ahaanba laga tago dhaqamadan waxyeellada leh.. Arrimahan waa inay ka mid noqdaan:

- In sare loo qaado wacyiga culimada diinta ee ku saabsan xaqiiqda ah in ay sharci darro tahay in ay ku dhiirrigeliyaan gudniinka fircooniga iyo guurka carruurta, isla markaana ay mutaysan karaan dacwad haddii ay meheriyaan gabar ka yar 18 sano ama ansixiyaan nikaaxaheeda [shahaadada nikaaxa Shareecada]
- In culimada lagu dhiirrigeliyo in ay raadiyaan oggolaansho toos ah oo ka yimaada gabdhaha yaryar marka ay meherinayaan, halkii ay u aqbali ama u arki lahaayeen aamusnaanta gabadha inay tahay ogolaansho;
- In bulshada lagu wacyigeliyo khataraha gudniinka fircooniga (gaar ahaan gudniinka nooca saddexaad/ infibulation) iyo guurka carruurta, iyo faa'iidooyinka ku jira in guurka dib loo dhigo ilaa qofku qaangaadho.
- In bulshada lakala baro farqiga u dhexeeya dhaqamada loo arko "sunna" iyo kuwa loo arko "xaaram inay yihiin"
- In la qabto dood qaran oo lagu caddeynayo dhinacyada diimeed ee gudniinka fircooniga ah iyo guurka carruurta, si loo helo isfaham guud oo ku saabsan sida loola tacaalo dhaqamadan (oo ay ku jiraan abaabulidda booqashooyin dalalka Muslimka ah ee gudniinku ku yar yahay), loona dhiso istiraatiijiyado isku dhafan oo loogu ololeeyo in la tirtiro;
- In la dhiso taageerada waxbarashada ee gabdhaha – si ay iyaga laftooda dartood wax ugu qabsan karaan iyo jiilalka mustaqbalkaba;
- In wax laga qabto caadooyinka guud ee la xiriira jinsiga (gender norms), oo ay ka mid tahay in la aqoonsado qiimaha ay gabdhaha iyo dumarku bulshada iyo qoysaska dhexdeeda ku leeyihiin, iyo muhiimadda ay leedahay in wiilasha iyo ragga la baro inay ka fogaadaan rabshadaha oo ay dumarka iyo xubnaha kale ee qoyska ula dhaqmaan si naxariis leh iyo ixtiraam leh.

Maadaama qabiilka iyo dhaqanka ay udub dhexaad u yihiin aqoonsiga dadka ku nool Afar iyo Soomaalida, isla markaana ay door weyn ku leeyihiin sii socoshada gudniinka fircooniga ah iyo guurka carruurta, waa in Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada ay si wadajir ah ula shaqeeyaan Wasaaradda Waxbarashada iyo ururada aan dowliga ahayn ee diiradda saara arrimaha carruurta iyo jinsiga, si ay si dhow ula shaqeeyaan madaxda dhaqanka/ qabiilka si loo beddelo aaminsanaanta iyo dhaqamada gabdhaha iyo haweenka u horseeda takoor. Si ay u hirgasho tani waa inay arrimahan ka mid noqdaan:

- Kor u qaadidda waxbarashada gabdhaha;
- Wacyigelin ballaadhan oo ku saabsan khataraha gudniinka fircooniga ah, gaar ahaan nooca tolida iyo xidhida (infibulation)-ka, iyadoo loo marayo hannaan isku dhafan, sida idaacadaha, baraha bulshada, telefishinka, wadahadallada bulshada, naadiyada jinsiga

ku saleysan ee iskuulada, iyo booqashooyin guri-guri ah oo ay sameeyaan shaqaalaha fidinta caafimaadka.

- Kor u qaadidda wacyiga ku saabsan khataraha guurka carruurta iyo faa'iidooyinka uu leeyahay dib-udhigista guurka ilaa qofku qaangaadho;
- In la hubiyo in bulshada — gaar ahaan haweenka hooyooyinka ah iyo haweenka gudayaasha ee dhaqanka ah— ay si buuxda u ogaadaan in dhammaan noocyada gudniinka fircooniga ah ay yihiin sharcidarro, islamarkaana ay ku mutaysan karaan ganaax iyo xabsi.

## Waaxda Caddaaladda

Maaddaama aqoonta sharciga mamnuucaya gudniinka fircooniga ah iyo guurka carruurta ay weli xaddidan tahay, iyo sidoo kale fulinta sharcigaas, waaxda caddaaladdu waa inay xoojisaa dadaalladeeda si ay u dhiirrigeliso una dhaqan geliso sharciyada qaranka ee la dagaallamaya dhaqamada waxyeellada leh. Arrintan waxa ka mid noqonaya:

- In lala shaqeeyo ururrada ku saleysan xuquuqda aadanaha (sida Guddiga Xuquuqul Insaanka Itoobiya iyo Ururka Qareenada Haweenka Itoobiya) si ay ula doodaaan mas'uuliyiinta iyo sharci-dejiyeyaasha heer Deegaan, si sharciyada Deegaanada loola waafajiyo sharciyada qaranka ee mamnuucaya gudniinka fircooniga ah iyo guurka carruurta, loona ansixiyo Xeerka Qoyska si dhaqamadan dambi looga dhigo;
- In lala shaqeeyo maxkamadaha shareecada si loo horumariyo xuquuqda gabdhaha iyo haweenka ee ku aaddan waxbarashada, dhaxalka, iyo in laga ilaaliyo rabshadaha — oo ay ku jiraan gudniinka fircooniga ah, guurka carruurta, iyo dagaalada lammaanaha isku dhow ka dhex dhaca — loona xoojiyo iskaashiga ka dhexeeya maxkamadaha shareecada iyo nidaamka garsoorka rasmiga ah;
- In lala shaqeeyo wasaaradaha kale ee dowladda, Isbahaysiga Qaranka ee Ciribtirka Gudniinka Fircooniga ah iyo Guurka Carruurta, iyo Golaha Diimaha Itoobiya si loo ballaariyo fatwadii 2023 ee dhanka ahayd noocan tolida iyo xidhida(infibulation) ka, looguna daro qeexitaan caddaynaya inaysan jirin qayb jirka dumarka ka mid ah oo diintu mamnuucday ama xaaran ah (haram).
- La shaqeynta madax dhaqameedyada iyo hogaamiyeyaasha bulshada si loo xaqiijiyo in bulshooyinka ay si cad u fahmaan in dhammaan noocyada Gudniinka Fircooniga (FGM) yihiin sharcidarro, iyada oo la xoojinayo in muddada dhow xooga la saarayo yareynta waxyeellada dhaqamadan, halka muddada fogna laga shaqeynayo ciribtirka dhaqankaas, iyadoo la og yahay in tani ay noqon karto hawl waqti dheer qaadan karta isla markaana aan si toos ah u socon doonin;
- La shaqeynta hogaamiyeyaasha dhaqanka iyo bulshada si loo hubiyo in la fahmo oo ay si buuxda u ogaadaan in dhammaan noocyada guurka carruurta – xitaa kuwa ay dhalinyaradu bilaabaan – ay sharcidarro yihiin; waxayna keeni karaan khataro caafimaad, fursado yaraan waxbarasho iyo dhaqaale, iyo furiin hore iyo ceeb la socota;
- In la dhiso habab qarsoodi ah oo lagu soo sheego qorsheyaasha gudniinka fircooniga iyo guurka caruurta, iyadoo laga hirgelinayo dugsiyada iyo goobaha kale ee bulshada, si looga hortago in ay qabsoomaan ama lagu buriyo guur dhowaan dhacay;
- In lala shaqeeyo bulshada si loo dejiyo ciqaabo la dhaqan gelin karo – oo loo adeegsan karo waalidiinta, gudayaasha dhaqanka, raga guursada caruurta, iyo kuwa nikaxa ama meherka fuliya – xitaa marka ay dhacdo meel ka baxsan deegaanka, lana xoojiyo habraacyada iyo kormeerka heerka xaafada(kebele);
- In lala shaqeeyo gabdhaha iyo haweenka si loo kordhiyo wacyigooda ku saabsan xuquuqdooda iyo xuquuqda ay mustaqbalka yeelan karaan gabdhahooda, iyo sida ay xuquuqahaas u sheegan karaan, isla markaana lala shaqeeyo hooyooyinka si loo fahamsiiyo ciqaabaha ka dhalan kara gudniinka fircooniga ee gabdhaha.
- la shaqaynta ragga iyo wiilasha si loo kordhiyo wacyi gelinta ku aaddan sharciga iyo ciqaabaha ka dhalan kara jebinta sharciga la xiriira gudniinka fircooniga (aabbayaasha) iyo guurka carruurta(ragga guursaday/ Aaabayaasha).

Maadaama gudniinka loo arko waajib diini ah, guurka carruurtana la arko inuu yahay mid diin ahaan la oggol yahay – xitaa la doorbido – waa muhiim in waaxyaha Garsoorka iyo Haweenka iyo Arrimaha Bulshada ay si dhow ula shaqeeyaan hay'adaha aan dowliga ahayn iyo culimada si loo yareeyo waxyeellada dhaqamadaas oo ugu dambeyntii looga tago. Tan waxaa ka mid noqon kara:

- In lagu wacyigeliyo Culimada diinta in ay tahay sharci darro in ay ku dhiirrigeliyaan ama u olaleeyaan gudniinka fircooniga ee gabdhaha iyo guurka caruurta, isla markaana ay wajihi karaan dacwad sharci ah haddii ay fuliyaan guurka caruurta/ ama ansixiyaan nikaxa (shahaadada guurka shareecada) ee gabdho da'doodu ka yar tahay 18 sano.
- In la bixiyo wacyigelin ku saabsan halista gudniinka gabdhaha (gaar ahaan nooca fircooniga ah) iyo guurka caruurta, iyo faa'iidooyinka ku jira in la dib dhigo guurka ilaa gabadhu gaadho da'da qaangaarka;
- In bulshada lakala baro farqiga u dhexeeya dhaqamada la oggol yahay ee sunna ah iyo kuwa ka baxsan oo xaaraan ah;
- In la wajaho fahamka khaldan ee sheegaya in gudniinka iyo guurka caruurtu yihiin kuwo diin Islaamku oggol yahay ama faray, lana sameeyo dood diini ah oo adag

oo lagu taageerayo in dhaqamadaas la joojiyo (oo ay ku jirto ka jawaabidda rumaysnaanta ah in gabadh la guday kaliya ay gali karto masaajid ama salaadi karto).

- In la dhiso taageerada waxbarashada gabdhaha, iyada oo laga duulayo danahooda gaarka ah iyo kuwa jiilasha soo socda;
- In la wajaho caadooyinka iyo xeerarka jinsiga ee baahsan, oo ay ku jirto in la aqoonsado qiimaha ay gabdhaha iyo dumarku ku leeyihiin qoysaska iyo bulshooyinka, iyo muhiimadda ay leedahay in wiilasha iyo ragga la baro in ay ka fogaadaan rabshadda oo ay u muujiyaan naxariis iyo ixtiraam dumarka qoysaskooda ka tirsan.

## Waaxda Waxbarashada

Maadaama ay gabdhuhu aad uga badan yihiin wiilasha marka la fiiriyo xaga ka hadhitaanka waxbarashada, iyo maadaama waxbarashada gabdhuhu ay fure u tahay awood-siintooda iyo joojinta gudniinka fircooniga ah iyo guurka carruurta, waxaa lagama maarmaan ah in waaxda waxbarashadu ay laba-laabto dadaalladeeda si loo hubiyo in dhammaan gabdhuhu helaan fursad waxbarasho, ugu yaraana dhameeyeen dugsiga dhexe, iyo in sida ugu fiicanba ay dhammeeyaan dugsiga sare. Tani waa in ay ka mid noqdaan:

- In la hubiyo in dhammaan bulshooyinka (oo ay ku jiraan reer guuraaga) ay haystaan dugsi tayo leh oo bixin kara waxbarasho ugu yaraan ilaa fasalka 6aad, iyo in la ballaadhiyo fursadaha ay gabdhaha waaweyn iyo haweenka (kuwa horey u seegay waxbarashada) ku baran karaan akhriska iyo xisaabta;
- Booqashooyin guri-guri ah oo lagu diiwaangelinayo carruurta ka maqan dugsiyada ama kuwa si joogto ah u maqnaada, iyadoo waalidiinta carruurta aan joogin dugsiyada la ganaaxi karo, hadba sida ku habboon;
- Ballaadhinta manhajka waxbarashada iyo waxqabadka dugsiyada (tusaale ahaan, naadiyada gabdhaha/jinsiga) ee ka hadlaya qiyamka jinsiga, oo ay ku jirto feejignaanta gaar ah ee ceebta la xiriirta dhiigga caadada iyo musqulaha, gudniinka, guurka carruurta, iyo rabshadaha ku saleysan jinsiga;
- Shaqo gelinta macallimiin dumar ah oo dheeraad ah si ay gabdhuhu u helaan tusaale wanaagsan;
- Hubinta in ardayda ka soo jeeda qoysaska saboolka ah ay helaan agabka waxbarasho ee lagama maarmaanka ah;
- Mudnaanta la siiyo maalgashi kordhaya oo dhan fasallada kala duwan, oo ay ku jiraan barnaamijyada cuntada dugsiyada, adeegyada biyaha, fayadhowrka, nadaafadda dhiigga caadada, naadiyada gabdhaha, buugaagta, maktabadaha, iyo taageero waxbarasho;
- Dhisidda dugsiyo dhexe iyo sare oo badan meelaha baadiyaha ah iyo maalgelinta fursado hoy ammaan ah oo la awoodi karo ardayda (gaar ahaan gabdhaha) muddada dhexe;
- In la kordhiyo kormeerka xafiisyada waxbarashada ee heer degmo, iyadoo loo adeegsanayo dhiirrigelin macallimiinta si loo yareeyo ka-tagista shaqada iyo maqnaanshaha.

Sababtoo ah aabayaasha, walaalaha, raga dhallinyarada ah, saaxiibada iyo sayga ayaa kaalin ku leh sii wadidda dhaqamada jinsiga ee hoos u dhigaya gabdhaha iyo haweenka – oo ay ku jirto gudniinka (inkasta oo arrintani dumarka uun gaar utahay) – waa in waaxda waxbarashada ay si wadajir ah ula shaqeyso Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada iyo hay'adaha aan dowligaa ahayn ee diiradda saara carruurta iyo jinsiga, si ay uga faa'iideystaan kulamada ka dhaca dugsiyada iyo bulshada iyo ololayaasha warbaahinta si loo beddelo aragtida iyo dhaqanka raga. Tani waa in ay ka mid noqdaan:

- In la caawiyo aabbayaasha iyo walaalaha si ay u fahmaan sida ay u taageeri karaan xaasaskooda iyo walaalahood si gabdhuhu u helaan waqti ay wax ku bartaan;
- In wiilasha iyo ragga la baro sababta aysan muhiim u ahayn in gabadh la guursado haddii la guday, iyo sida ay u difaaci karaan walaalahooda iyo gabdhahooda, ugana hortagi karaan dhaawac dheeraad ah oo soo gaadha xaaskooda;
- In la kala saaro heerka raga ee bulshada laga qabo iyo daahirnimada galmada ee gabadhaha iyo guurka "guusha leh";
- In wiilasha iyo ragga la baro faa'iidooyinka ay leedahay xaas weyn (tusaale ahaan: gacan-yari fiican, khatar yar xilliga dhalmada), iyo dhibaatooyinka ku jira guurka carruurta (sida: furiin hore, dhibaatooyin korinta ilmaha, iyo khilaaf ku yimaadda galmada);
- In la dhiirrigeliyo go'aan wadaag ku salaysan caddaalad gudaha qoyska iyo shaqo-qaybsiga, isla markaana la diido ragganimada rabshadaha ku dhisan.
- Maadaama qabiilka iyo dhaqanku ay saldhig u yihiin aqoonsiga Afar iyo Soomaali, sidoo kalena ay door weyn ku leeyihiin sii jirista gudniinka iyo guurka carruurta, waa in waaxda waxbarashadu ay si dhow ula shaqeyso Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada iyo hay'adaha aan dowliga ahayn si ay ula shaqeeyaan hogaamiyeyaasha dhaqanka si loo beddelo fikradaha iyo dhaqamada sii curyaaminaya gabdhaha iyo haweenka. Tani waa in ay ka mid noqdaan:
- Dhiirrigelinta waxbarashada gabdhaha;
- Wacyigelinta khataraha gudniinka, gaar ahaan fircooniga, iyadoo la adeegsanayo raadiyaha, baraha bulshada, telefishinka, wadahadallo bulsho, naadiyada jinsiga ee dugsiyada, iyo booqashooyin guri-guri ah oo ay sameeyaan shaqaalaha caafimaadka;

- Wacyigelinta khataraha guurka carruurta iyo faa'iidooyinka guurka dib u dhacaa ilaa da'da dadka waaweyn;
- Hubinta in bulshooyinka – gaar ahaan hooyooyinka iyo haweenka dhaqanka – ay fahmaan in dhammaan noocyada gudniinka dumarka ay sharci-darro yihiin laguna mutaysan karo ganaax iyo xabsi.

### Hay'adaha aan dowliga ahayn (NGOs)

Sababtoo ah dhaqamada jinsiga ee xaddidaya nolosha gabdhaha iyo haweenka sidoo kale waxay xaddidaan awoodda bulshooyinka iyo hogaamiyeyaasha inay gartaan oo wax ka qabtaan dhaqamadaas, waa muhiim in hay'adaha aan dowliga ahayn ee diiradda saaraya carruurta iyo jinsiga ay la shaqeeyaan Wasaaradaha Haweenka, Waxbarashada, iyo bulshada si ay u beddelaan fikradaha iyo dhaqamadan, uguna dhisaan awood bulsho oo horumarin karta sinnaanta jinsiga. Faragalintu waa in la ballaariyaa si saameyn u yeelato, loogana shaqeeyo in isbeddelku ku yimaaddo waqtigiisa. Waxaana loo baahanyahay inay ku jiraan:

- Taageeridda gabdhaha si ay u helaan waxbarasho una guuleystaan;
- Xoojinta naadiyada gabdhaha iyo kuwa jinsiga ee dugsiyada;
- Caawinta aabbayaasha iyo walaalaha si ay u taageeraan haweenkooda una furaan fursado ama u helaan waqti waxbarasho gabdhahu dhigtaan;
- Ka qeybgalka wiilasha iyo gabdhaha dhallinyarada ah ee ka doodaya gudniinka iyo guurka carruurta si loo beddelo dhaqamada hadda jira ama loo dhiirrigeliyo isbeddel jiil ba jiil ku imaanaya;
- Bixinta koorsooyin wacyigelin waalidiinta ah (hooyooyin iyo aabayaal) oo si toos ah u wajahayaan dhaqamada jinsiga iyo sida ay u dhaawacaan gabdhaha iyo haweenka;
- Taageeridda haweenka si ay u fahmaan xuquuqdooda (iyo tan gabdhahooda) iyo sida loo helayo;
- Dhiirrigelinta ragga in ay diidaan ragganimada rabshadaha ku dhisan oo ay qaataan go'aan wadaag iyo caddaalad ku salaysan shaqo-qaybsiga gudaha qoyska;
- Kala saaridda sumcadda waalidiinta ee bulshada dhexdeeda iyo fikirka ay ka aaminsan yihiin daahirnimada gabdhaha iyo guurka "guusha leh";
- Horumarinta tusaalayaal bulsho – gabdho iyo haween waxbaratay, iyo wiilal iyo rag horumar qaba – kuwaasoo u shaqeyn kara sidii horkacayaal isbeddel bulshada iyo baraha bulshada;
- La shaqeynta hogaamiyeyaasha deegaanka iyo bixiyeyaasha adeega si loo wacyigeliyo waxyeelada ka dhalata dhaqamada jinsiga xagjirka ah iyo faa'iidooyinka ay leedahay (heerkasta: shaqsiyadeed, qoys iyo bulsho) gabdhaha waxbartay oo dhaqaale ahaan xoogan;
- La shaqeynta Wasaaradaha Haweenka iyo Waxbarashada si loo wacyigeliyo culimada iyo hogaamiyeyaasha dhaqanka ee waxyeellada gudniinka iyo guurka carruurta.

### Waaxyaha Beeraha, Shaqada, iyo Maareynta Masiibooyinka

Sababtoo ah caddaymaha caalamiga ah ayaa muujinaya in habka ugu wanaagsan ee looga hortago guurka carruurta uu yahay in gabdhaha lagu hayo dugsiga intii suurtagal ah, waa in waaxyaha beeraha, maaraynta masiibooyinka, iyo sugnaanta cuntada ay la shaqeeyaan waaxda waxbarashada si ay u adeegsadaan barnaamijyada ilaalinta bulshada si qoysaska loogu dhiirrigeliyo inay gabdhahooda waxbarasho siiyaan oo guurka dib u dhigaan. Tani waa in ay ka mid noqdaan:

- Bilaabidda/dib u bilaabidda/sii wadidda barnaamijyada cuntada dugsiga, oo leh raashin la geynayo guryaha gabdhaha si taageero dheeri ah u helaan;
- Maalgelinta lacag celin iyo hanti la wareejinayo si loogu taageero waxbarashada gabdhaha – si gaar ah haddii lagu xidho shuruudo sida joogitaanka gabadha dugsiga ay joogto, inaan la guursan, iyo in waalidiinta iyo dhallinyarada ay ka qeyb galaan barnaamijyada jinsiga diiradda saaraya; Meelaha ay suurtagalka tahay, adeegsiga madal barnaamijka Badbaadada Waxsoosaarka (PSNP) si loogu sahlo bartilmaameedka iyo hirgelinta.

Sababta oo ah gabdhaha iyo haweenka ku nool bulshooyinka reer guuraaga waxay haystaan fursado aad u kooban oo ay dakhliga ku kasbadaan, waa in waaxaha beeraha iyo shaqaaleynta ay kordhiyaan dadaalladooda si loo ballaadhiyo loona kala duwo fursadaha nolosha ee dumarka, si ay u helaan beddelka guurka carruurtinimada iyo hab kale oo ay ku helaan maamuus bulshada dhexdeeda. Dadaalladan waa in lagu lamaaneeya wacyigelin, si loo hubiyo in horumarintaas dumarku ay u helaan maalgelin, aysan noqon mid sabab u ah oo sii xoojinaysa gudniinka fircooniga Tan waxaa ka mid noqon kara:

- Horumarinta xirfado iyo tababaro (oo lagu saleeyo isbeddelka cimilada iyo cudurrada dhirta/duunyada) loogu talagalay gabdhaha waaweyn iyo haweenka, oo ay ku jiraan xanaanada xoolaha, beerashada, ganacsiga iyo xirfado dhaqameed kale, iyadoo lala jaanqaadayo xirfadaha nolosha iyo maareynta ganacsiga/maalgelinta;
- Fursado dheeraad ah oo gabdhaha iyo haweenka waaweyn u helaan adeegyo keyd iyo amaah rasmi ah, iyadoo la soo bandhigayo haweenka ganacsatada beeraleyda ah (sida: caanaha, shinnida, digaagga) iyadoo loo adeegsanaayo raadiyaha iyo carwooyinka deegaanka si loogu dhiirrigeliyo gabdhaha yaryar loogana hortago doorka dhaqameed ee jinsiga.

### Waaxda Caafimaadka

Sababtoo ah gabdhaha iyo haweenka la guday badanaa waxay la kulmaan xanuun iyo infekshan noloshooda oo dhan, sababtoo ah kororka baahsan ee la xiriira in gudniinka loo beddelo mid caafimaad loo ekeysiiyo, iyo sababtoo ah suurtagalnimada in la kala saaro guurka carruurta iyo uurka dhallinyarada, waa in xafiisyada caafimaadka ee heer gobol iyo degmo ay laba-laabaan dadaalkooda si loo hubiyo in shaqaalaha caafimaadku kaalin ku yeeshaan dhimista dhaqamada waxyeellada leh. Tani waa in ay ka mid noqotaa:

- Tababaridda shaqaalaha caafimaadka ee deegaanka iyo kuwa kale ee bixiya adeeg caafimaad oo la xiriira khataraha jidheed iyo maskaxeed ee gudniinka;
- Wacyigelinta bulshada (oo ay ku jiraan xilliyada booqashada uurka iyo tallaalka carruurta, iyadoo la tixgelinayo aaminsanaanta deegaanka) noocyada kala duwan ee gudniinka (oo ay ku jiraan kuwa u dhigma iyo kuwa aan u dhigma ahayn sunna) iyo cawaaqibta nolosha ee ka dhasha;
- Ka qeybgalinta shaqaalaha caafimaadka ee deegaanka la socodka isbeddelka dhaqamada, kuna wargeliya si joogto ah xafiisyada caafimaadka iyo haweenka si loo habeeyo fariimaha iyo barnaamijyada;
- Hubinta in gabdhaha iyo haweenka la guday ay helaan daryeel caafimaad oo ku habboon marxaladaha kala duwan ee noloshooda;
- Tababaridda xirfadlayaasha caafimaadka si ay u fahmaan mamnuucista Xeerka Qoyska ee dalka uu mamnuucay Gudniinka , iyo in ciqaab la marsiiyo xirfadle kasta oo caafimaad ah oo qabta (xitaa xilliga dhalmada), iyadoo la raacayo tilmaamaha Wasaaradda Caafimaadka ee 2017. Waa inay ku jirtaa Bixinta tilmaamo cad laga bilaabo heerka xafiiska caafimaadka ee deegaan ilaa degmo iyo xaafad (kebele) oo ku saabsan mamnuucista caafimaadka ee gudniinka, iyo ciqaabta la xiriirta haddii caddayn la helo;
- Taageeridda shaqaalaha caafimaadka deegaanka si ay ugu ololeeyaan – xitaa meelaha baahidoodu yar tahay – in gabdhaha la guursaday loo oggolaado in ay isticmaalaan ka hortagga uurka ilaa jidhkoodu qaan-gaadho;
- Ka qaybqaadashada madasha Bariga Afrika ee UNICEF iyo UNFPA ay aasaaseen, oo Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshaduna ay xubin ka tahay, si wadajir loogula dagaallamo gudniinka, iyadoo la is dhaafsado caddayn sanadle ah, shirarkana lagu qorsheeyo tallaabooyin istiraatiiji ah.

### Dowlad Deeganada

Sababtoo ah Deegaanda Afar iyo Soomaalida wali ma ay na muujin horumarka ay gaareen deegaanada kale ee Itoobiya ee dhimista gudniinka fircooniga iyo guurka carruurta, madaxda dawlad deegaannada Afar iyo Soomaalidu waa in ay maalgeliyaan dadaallo lagu dhiirrigelinayo isbeddel bulsheed oo wanaajin kara nolosha gabdhaha iyo haweenka, isla markaana kor u qaadi kara horumarka guud. Tani waa in ay ka mid noqotaa:

- Dadaalka lagu ogaanayo horkacayaal (gaar ahaan culimada,oday dhaqameedka,gudayaash dhaqanka iyo dumarka noloshoodu ama tan gabdhahoodu ay saameyn xun ku yeesheen gudniinka fircooniga/guur caruureed) diyaar u ah inay dhiirrigeliyaan isbeddel;
- Ansixinta Xeerka Qoyska ee qaran oo mamnuucaya gudniinka fircooniga iyo guurka carruurta;
- U qoondeynta kheyraad bani'aadamnimo iyo dhaqaale oo ku filan si wax looga qabto dhaqamada jinsiga ee xadidaya gabdhaha iyo haweenka;
- Kormeeridda hay'adaha heer waaxeed si loo hubiyo inay gutaan waajibaadkooda la xiriira gudniinka fircooniga iyo guurka carruurta;
- Maalgelinta kormeer iyo qiimeyn ku saleysan caddayn ee barnaamijyada la dagaallamaya gudniinka iyo guurka carruurta, iyadoo la diiradda saarayo bulshooyinka fog ee ay ku badan tahay dhaqamadaas.

### Isbahaysiga Qaran ee Joojinta Gudniinka Fircooniga ah iyo Guurka Carruurta

Maadaama Isbahaysiga Qaran ee Joojinta Gudniinka Fircooniga ah iyo Guurka Carruurta uu si gaar ah ugu habboon yahay sii wadidda iyo dardargelinta dadaallada lagu ciribtirayo dhaqamadan, waa lama huraan in xubnaha Isbahaysigu ay si wadajir ah u furaan waddooyin cusub oo isbeddel ah isla markaana ay soo saaraan dad hormuud u noqon kara ciribtirka dhaqamadan heer kasta. Isbahaysigu waa in uu:

- Wax ka qabtaa la shaqeynta mas'uuliyiinta heer deegaan si loo dhiirrigeliyo is-waafajinta shuruucda qaranka iyo kuwa deeganada; la shaqeeyaa mas'uuliyiinta hoosaadyada si loo kordhiyo wacyigelinta lana xoojiyo fulinta; la shaqeeyaa mas'uuliyiinta deegaanka si loo adkeeyo ka go'naanshaha la dagaallanka dhaqamadan iyo la socodkooda ila heer kebele; la shaqeeyaa hogaamiyeyaasha diinta iyo qabiilada si loo dhiso qorshayaal la taaban karo oo la jaanqaadaya deegaanka;
- La shaqeeyaa wasaaradaha khuseeya (gaar ahaan caafimaadka, waxbarashada iyo cadaaladda) si looga dhigo ka hortagga guurka carruurta iyo gudniinka fircooniga ah qayb ka mid ah qorshayaasha wasaaradaha, oo ay ku jiraan dadaallada in lagu hayo gabdhaha dugsiyada, taageeridda ballaarinta naadiyada gabdhaha iyo kuwa sinnaanta jinsiga, iyo la dagaallanka caafimaadeynta gudniinka fircooniga (FGM);
- Taageeridda, dhisidda awoodda saxafiyiinta iyo soosaarayaasha warbaahinta si ay u tabiyaan

arrimaha awood-siinta hablaha iyo dumarka, si ay ugu wacyigeliyaan uguna dhiirrigeliyaan hablaha dhallinyarada ah iyo dadka masuulka ka ah inay fahmaan kartidooda, ugana weecdaan caadooyinka jinsi ahaaneed ee takoorista ku dhisan, una horseedaan nolol ay ku madax-bannaan yihiin kuna awood badan yihiin;
- Sii wadista maalgelinta ururinta caddaymaha, wacyigelinta ku salaysan xogta la xaqiijiyey, iyo barashada casharro cusub.

### Deeq-bixiyaasha

Maaddaama la-dagaallanka gudniinka fircooniga ah (FGM) iyo guurka carruurta uu yahay hawl u baahan kheyraad badan isla markaana leh baahi joogto ah oo muddo dheer ah, lama huraan ayey tahay in la ballaariyo lana joogteeyo maalgelinta barnaamijyada ku saleysan caddaynta cilmiyeed. Tani waa in ay ku jiraan:

- Maalgelinta waxbarashada carruurta oo dhan, oo ay ku jiraan kuwa ku nool bulshooyinka reer-guuraaga ah ee ku sugan meelaha fog-fog — taasi oo aan ku ekeyn dhisidda dugsiyo kaliya, balse sidoo kale la taageero tababarka macallimiinta iyo cuntada dugsiga si loo gaaro natiijooyin waara;
- Kordhinta barnaamijyada ilaalinta bulshada (social protection) ee loogu talagalay qoysaska ugu nugul, iyadoo la adeegsanayo taageeradaasi si loo horumariyo waxbarashada hablaha lana yareeyo guurka carruurta;
- Xoojinta awoodda hay'adaha hoose (sub-national capacity) si loo hagaajiyo adeegyada deegaanka;
- Maalgelinta barnaamijyo beddela caadooyinka jinsiyeed ee xaddidan, kuna dhiirrigeliya sinnaanta;
- Hagaajinta iyo la falgalka barnaamijyada si loogu habeeyo duruufaha deegaanka, si gaar ah loogu habeeyo baahiyaha gaarka ah ee bulshada la beegsanayo;
- Maalgelin la-socod joogto ah, qiimeyn iyo cilmi-baaris waqti dheer socota, si loo cabbiro horumarka lana fahmo sida ugu habboon ee kheyraadka kooban loogu adeegsado iyadoo la eegayo duruufaha deegaanka, iyo sidoo kale sidii barnaamijyada wax-kuoolka ah loogu baahin lahaa heer ballaaran.

## Tixraacyada


28toomany iyo Orchid Project (2023) *FGM/C in Ethiopia: warbixinta cusbooneysiinta dalka, Juun 2023*. (https://www.fgmcri.org/media/uploads/Country%20Research%20and%20Resources/Ethiopia/ethiopia_country_profile_update_v2_(august_2023).pdf)

Hay'adda Dhexe ee Tirakoobka Itoobiya (CSA) iyo ICF (2017) *Sahan tirakoobka iyo Caafimaadka ee Itoobiya 2016*. Addis Ababa, Itoobiya iyo Rockville, Maryland, USA: CSA iyo ICF (https://dhsprogram.com/pubs/pdf/FR328/FR328.pdf)

Elezaj, E., Ramful, N., Cebotari, V. iyo De Neubourg, C. (2019) *Sinnaanta jinsiga, awood-siinta haweenka iyo daryeelka carruurta ee Itoobiya*. UNICEF Itoobiya iyo Wasaaradda Haweenka, Carruurta iyo Dhallinyarada (www.unicef.org/ethiopia/media/2811/file/Gender%20Equality,%20Women's%20empowerment%20and%20child%20wellbeing%20in%20Ethiopia.pdf)

Endale, K., Jones, N., Presler-Marshall, E., Woldehanna, T., Yadete, W., Abdisalam, A., Alemu, A., Gebeyehu, Y., Gezahegne, K., Murha, R., Neumeister, E., Tesfaye, A., Tilahun, K. iyo Workneh, F. (2022). *Daraasad ku saabsan qaab-dhismeedka iyo sababaha gudniinka fircooniga ah (FGM/C) iyo guurka carruurta ee bulshooyinka xooladhaqatada Itoobiya: Warbixinta heerka bilowga ee gobollada Afar iyo Soomaalida*. London: Gender and Adolescence: Global Evidence (GAGE). (www.gage.odi.org/publication/exploring-the-patterningand-drivers-of-fgm-c-and-childmarriage-in-pastoralistethiopia-baseline-report-from-afarand-somali-regions)

Endale, K., Presler-Marshall, E., Yadete, W., Jones, N., Gebeyehu, Y., Abdiselam, A., Tilahun, K., Workneh, F. iyo Woldehanna, T. (2025). *Dareenka, caadooyinka iyo dhaqamada la xiriira gudniinka fircooniga ah (FGM) iyo guurka carruurta: Natiijooyinka heerka dhexe*. Warbixin. London: Gender and Adolescence: Global Evidence. (xxx)

Erulkar, A. (2022). "*Isbeddellada ku yimid baahida guurka carruurta ee Itoobiya, 2005–2016.*" Reproductive Health 19 (Suppl 1): 195 (https://doi.org/10.1186/s12978-021-01234-4)

Islamic Relief Worldwide (2018). *Hal goyn ayaa ka badan! Warbixinta siyaasadeed ee Islamic Relief ku saabsan gudniinka/murq-jaridda xubinta taranka dumarka*. Birmingham: Islamic Relief Worldwide (www.islamic-relief.org/wpcontent/uploads/2018/03/FGM-CSW62.pdf)

UNICEF (2023). "*Ma suurtagalbaa in lagu guuleysto joojinta guurka carruurta? Isbeddellada ugu dambeeyay iyo fursadaha mustaqbalka.*" Xogta UNICEF, 5 May (https://data.unicef.org/resources/is-an-end-to-childmarriage-within-reach)



Warbixintan Siyaasadeed waa natiijo ka timid barnaamijka Gender and Adolescence: Global Evidence (GAGE) oo ay maalgeliso UK aid oo ka socota dowladda UK, iyo sidoo kale hay'adda Irish Aid oo ka wakiil ah dowladda Ireland gudaha Itoobiya. Si kastaba ha ahaatee, aragtida iyo xogta ku jirta warbixintan ma aha kuwo si rasmi ah u matalaya siyaasadaha rasmiga ah ee dowladda UK ama dowladda Ireland, mana ansixin midkoodna. Labada dowladood midkoodna mas'uul kama aha aragtiyahaas ama xogtaas, ama kalsoonida lagu qabo.

ISBN: 978-1-915783-90-5


GENDER & ADOLESCENCE: GLOBAL EVIDENCE

Ambasáid na hÉireann
Embassy of Ireland

UKaid
from the British people